



**Edmonton**

## HAGEHA QOKFA EDMONTON KU CUSUB

Hage hordhac ah oo dadka Edmonton ku cusub ka caawinaya degaamaynta

**12**

SHAY OO AY  
TAHAY INAAD

EDMONTON KA OGAATO

# HAGEHA QOKA EDMONTON KU CUSUB!

Aad baan ugu faraxsanahay in aad go'aansatay in aad Edmonton degto. Edmonton waa magaalo ku habboon nolosha, shaqada iyo madadaalada. Laakiin waxaa suuragal ah in ay aadkaato in qofku la qabsado nolosha meel uu ku cusub yahay.

Hagehan waxaa loogu talagalay in uu adiga iyo qoyskaagaba ka caawiyo sidii aad u heli lahaydeen macluumaad muhiim ah oo ku saabsan nolosha magaaladeena haddii aad Edmonton ku cusub tahay, Alberta ku cusub tahay ama aad Kanada ku cusub tahay. Gudaha hagehan waxaad ka helaysaa liis adeegga iyo ururada ah kaa oo ku hagaya si ay u saldhigato noloshaadan cusubi. Qaar ka mid ah adeeggan waxaa bixiya magaalada Edmonton, qaar kalena ururo maxali ah.

Waxaan rajaynaynaa in hagehani uu kaa caawiyo in aad wax ka ogaato shaqada, caafimaadka, amniga iyo ku naaloodka nolosha Edmonton.

Afeef

Hagehani wuxuu taxayaa baro Internetka ah iyo lambarro telefoon oo ay leeyihii adeegyada badankoodu. In kasta oo aan isku daynay inaan macluumaad sax ah idiin soo gudbino, haddana macluumaadku wuu is badbadelaa. Fadlan telefoon ama Email u dir si aad u hesho goobta adeegga, saacadaha ay furan yihiin, iyo adeegga ay bixiyaan inta aadan tagin meel kasta oo ka mid ah goobaha aanu taxnay.

Hadafka hagehani ma aha inuu ku siiyo macluumaad kasta oo aad u baahan tahay laakiin waa in uu kuu hoggaamiyo sida iyo meelaha aad ka heli kartu macluumaadka aad u baahan tahay. Fiiri barta Internetka ee [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) si aad u hesho adeeg iyo wax qabad kale oo badan.

## TUSMADA BUUGGA

### 4 | KU SAABSAN EDMONTON

- 4 | Taariikhda Edmonton  
6 | Edmonton iyo Maanta

### 8 | WADASHAQAYN ADI DARTAA AH

- |   |   |
|---|---|
| 8   3da Heer ee Dawladda Adeegga Dawladda Hoose | 8 |
| Adeegga Dawlad Goboleedka                       | 9 |
| Dawladda Dhexe                                  | 9 |

### 10 | HELIDDA MACLUUMAADKA

- |  |  |
|--|--|
| 10   Magaalada Edmonton                              |  |
| 10   Xarunta Macluumaadka Dadweynaha iyo Dadka Cusub |  |
| 10   Adeegyada Magaalada: 311                        |  |
| 10   Shabakadda Caawimaadda: 211                     |  |
| 11   Bogga Internetka ee Magaalada Edmonton          |  |
| 12   Maktabadda Dadweynaha ee Edmonton               |  |

### 13 | DEGIDDA EDMONTON

- 14 | Adeegga Dejinta  
15 | Adeegga Tarjumaadda

### 16 | ISU SOCODKA EDMONTON

- |                              |  |
|------------------------------|--|
| 16   Jidodka iyo Waddooyinka |  |
| 16   Gaadiidka Dadweynaha    |  |
| 18   Gaadhi Wadidda          |  |
| 20   Baaskiilka iyo Lugta    |  |

### 21 | NOLOSHA EDMONTON

- |  |  |
|--|--|
| 21   Guryaha   |  |
| 24   Maamulka Lacagta                                    |  |
| 25   Ururo Diin ku Salaysan                              |  |
| 27   Cuntada Emonton                                     |  |
| 30   Eyda, Bisadaha iyo Xayawaana kale ee Rabbaayadaysan |  |
| 31   Maarynta Qashinka iyo dib u Warshadaynta            |  |

## **32 | WAXBARASHADA EDMONTON**

32   Barashada Ingiriiska	
33   Barashada Afka Farenjiga	
34   Waxbarashada Dadweynaha	
34   Dugsiyada Gaarka ah	
35   Tacliinta Sare	
35   Sii Wadida Waxbarashada	

## **36 | SHAQADA IYO EDMONTON**

36   Lambarka Caymiska Bulshada	
36   Xeerarka Shaqaalaha ee Alberta	
36   Helitaanka Shaqada	

## **38 | CAAFIMAADKA IYO EDMONTON**

38   Adeegga Caafimaadka iyo Daaweynta Dhakhtarka Ilkaha	39
Dhakhtarka Qoyska	39
Shabakadda Daryeelka Aasaasiga ah	39
Gargaarka Degdegga ah ee Cisbitaalada	40
Cisbitaalada	40
Rugaha Caafimaadka ee aad Ballan la'aan Tagi karto	40
Rugaha Caafimaadka Dad weynaha	41
Iskaashatada isku Dhafka ah ee Caafimaadka	41
Rugaha Caafimaadka Maskaxda (Wasaaradda Caafimaadka ee Alberta)	41
Xarunta wax ka Qabashada	
Dhibaatooyinka – Taageero 24 saac ah oo dhibanaha wax loogu qabanayo)	41
42   Adeegga Bulshada	
La Talin	42
Adeegga Dhallaanka iyo Dhalinyarada	43
44   Barnamijyada lyo Adeegga Bulshada	
Daryeelka Caruurta	44
Adeegga Dhallaanka iyo Dhalinyarada	44

45   Adeegga iyo Barnamijyada Waayeeleka Guryaha	45
Adeegga Taageerada	45
Xarumaha Waayeeleka	46
Gaadiidka Waayeeleka	46

## **47 | AMNIGA EDMONTON**

47   Xaaladaha Degdegga ah	
47   Gurmadka iyo Samatobixinta Dabka	
47   Adeegga Booliska ee Edmonton (EPS)	
48   Adeegga Dhibanaha	
48   Ilaalinta Gaadiidka Dadweynaha	
48   Xeerhoosaadka	
49   Rabshada Qoyska	
49   Isutagga Alberta ee ka Hortagga ka Ganacsiga Dadka	
49   Khadka ka Hortagga Faraxumaynta Ubadka	
49   Denbi Baajiyayaalka	
49   Xarunta ka Hortagga Faraxumanta ee Edmonton	
49   Rugta Xakamaynta Sunta	
49   GAADH Edmonton	
50   Sharciga iyo Xuquuqda Dadka	
Nidaamka Sharciga ee Kanada	50
Qareenada	51
Xuquuqda Dadka	51
Xeerka Qoyska	51

## **52 | KU RAAXAYSIGA EDMONTON**

53   Soo Jiidashada Magaalada Edmonton	
54   Isboortiga iyo Madadaalada	
54   Barnamijka Iisticmaalka Goobaha Raaxada	
55   Farshaxanka iyo Dhaqanka	
56   Waxyaalaha soo Jiidashada leh	
57   Ururada Bulshada	

57   Ururada Dhaqanka iyo Bulshada	
57   Dabbaaldeggaa	
57   Ka Qaybgalka Arimaha Bulshada – Mutadawacnimada	

58   Nolosha Jilaalka ee Edmonton	
Saadaasha Hawada	59
Dabaysha Qabow	59
Saacadda oo la baddalo	59
60   Warbaahinta – Maxaliga	
61   Warbaahinta – Qowmiyadaha	

## **62 | DAWLADDA HOOSE**


62   Madaxda la Doorto	
62   Xeerhoosaadka	
63   Maxaa ka Socda Xarunta Dawladda Hoose?	
63   Doorashada Dawladda Hoose iyo Codaynta	
63   Doorashada iyo Tirakoobka	
63   Ka Qaybgalka Dadweynaha	
63   Hay'adaha iyo Ururada Degaanka	

KU SAABSAN EDMONTON

# 01

## TAARIKHDA EDMONTON

4



Dadkii u horreeyey ee ku noolaada Edmonton waxay ahayeen dadkii dalka loogu yimid (First Nations) sida Cree, Nakoda, Sioux, Blackfoot iyo kuwo kale oo badan. Magaca Edmonton luuqadda Cree ga wuxuu noqonayaa Amiskwaciwâskahikan oo macnaheedu yahay Guriga Dalcadaha Beaverka (marka lasoo gaabiyoo waa amiskwaciy oo loogu dhawaaqo amisk-wa-chee).

Kumanaan sano ayey dadka dalka loogu yimid isugu iman jireen jiinka webiga Waqooyiga Saskatchewan (North Saskatchewan River) ee mara Amiskwaciy (Edmonton) si ay u ugaadhsadaan, kaluumaystaan, ganacsadaan, dhaqankoodana ugu dabbaaldegaan. Dhaqanka dadkii dalka loogu yimid wuxuu mudnaan xoog leh siiyaa xidhiidhka ka dhexeeya dadka, nabaadka, xayawaanka, biyaha iyo dhulka.

1795kii ayey shirkadda Hudson's Bay Company dhistay qalcadda Edmonton si ganacsiga harkaha iyo saamaha loo keeno. Dadkii dalka loogu yimidi waxay harkaha iyo saamaha (sida kuwa Beaverka) gacansata Reer Yurub kaga doorsan jireen agab sida buntukhyada iyo qalab gacmeed kale.

Maanta, wali waxaad arki kartaa Beaverka, oo ah xayawaanka Kanada calaamadda u ah, oo ku dhaqan dooxada webiga ee Edmonton.

Kanada waxay Ingiriiska ka xorowday 1867kii, isla kolkaa ayeyna dawladdii cusbayd ee Kanada bilowday inay heshiisyo la gasho dadkii dalka loogu yimid ee Galbeedka Kanada. Bishii Agoosto 21keedii, 1877 ayey dadkii dalka loogu yimid ee ku noolaa nawaaxiga Qalcadda Edmonton waxay dawladda Kanada la galeen Heshiiskii Lixaad. Heshiiska Lixaad wuxuu daboolayaa badhtamaha Alberta iyo Saskatchewan. Alberta, Heshiishka Lixaad waxaa soo hoos galaya 18 tol oo ka mid ah kuwii dalka loogu yimid hiddo ahaanna kasoo jeeda Cree, Nakoda Sioux, Saulteaux iyo Dene.


Fikrado kala duwan ayey Dawladda Dhexe ee Kanada iyo dadkii dalka loogu yimid ka qabaan macnaha heshiiska. Dawladda waxay la tahay in heshiisku uu soo afjaray sheegasho-dhuleedkii dadkii dalka loogu yimid. Dadkii dalka loogu yimidna waxay u qaateen heshiis muqadas ah oo abuuray xidhiidh lama ummadowd ka dhheeeyaa kaa oo socon doona inta "... cadceeddu ay ifayso, cawsku uu baxayo, webiyaduna ay rogmanayaan."

2012kii ayey Magaalada Edmonton waxay heshiis Isfaham, Iskaashi iyo Wadaxaajood la gashay Isbahaysiga Heshiiskii Lixaad ee Dadka Dalka loogu yimid, iyo mid kaa la mid ah oo Citiraaf iyo Iskaashi ku dhisan oo ay la gashay Ummadda Metis ee Alberta

2013ki. Heshiisyadani waxay balanqaadeen wadahadal iyo iskaashi, muunayn dhaqan iyo mid taariikheed, iyo in wax laga qabto arimaha saameeya dadka deggan Edmonton.

Tan iyo intii wax laga baddalay Dastuurka Kanada 1982kii, dawladda Kanada waxay si rasmi ah u aqoonsatay in dadka asalka ahi ay yihiin dadkii dalka loogu yimid, Métis (dadka ka farcamay dadkii dalka loogu yimid iyo reer Yurubkii Faransiiska ama Iskootishka ahaa) iyo Inuit. Maanta Edmonton waxay hoy u tahay tirada labaad ee ugu badan ee dadkii dalka loogu yimid ee reer beledka ah kuwaas oo ka kala yimid Alberta iyo Kanada inteeda kale, isuguna jira dadkii asalka ahaa, Métis iyo Inuit. 1900kii ayey daabiyad yari ka dhisantay agagaarka Qalcadda Edmonton. 1904tii ayey Edmonton si rasmi ah magaalo u noqotay, sanad ka dibna, 1905tii waxay noqotay caasimadda gobolka cusub ee Alberta.

Maanta waxaa Edmonton iyo nawaaxigeeda ku nool dad ka badan hal milyan. Magaaladeena nadiifta ah ee soodhawaynta leh waa meel aad ugu haboon in lagu noolaado, laga shaqeeyo qoysna lagu dhiso. Edmonton waxay leedahay dhaqaale hanaqaad ah, waxaana laga helaa fursado badan oo shaqo, ganacsi, isboorti, madadaalo iyo dhaqaale.



# EDMONTON IYO MAANTA

EDMONTON  
waxay hoy u tahay




dad ka kala yimid  
adduunka daafihiisa oo dhan.

Edmonton waxay leedahay  
daryeel caafimaad oo ka mid ah  
kuwa Kanada ugu wanaagsan.

Barnaamijyadeena dib-u-warshadaynta iyo maaraynta qashinka ee uu heerkoodu aad u sarreeyo ayaa waxay Edmonton ka dhigayaan magaalada Kanada ugu cagaaran.

Edmonton waxay leedahay nidaam tacliin sare oo aad u wanaagsan kaa oo ay ka mid yihiin jaamacado, kulyado iyo hayadaha waxbarashada dadweynaha oo ku jira kuwa dalka ugu wanaagsan.




Edmonton waxay leedahay  
nidaam dugsiyada  
dadweynaha ah oo  
kala duwan oo bixiya  
waxbarasho laga bilaabo  
barbaarinta ilaa fasalka  
12aad. Nidaamka dugsiyada  
dadweynaha waxa ka mid  
ah noocyoo kala duwan oo  
ku salaysan diin, luuqad,  
dhaqan, farshaxan ama  
isboortiga. Waxaa sidoo  
kale Edmonton laga  
helaa dugsiyo si gaar ah  
loo leeyahay oo bixiya  
waxbarasho kala duwan.



Edmonton waxaa sanad  
walba ka dhaca in ka  
badan 30 mahraajaan ama  
dabbaaldeg, waxaana  
loo yaqaanaa magaalada  
mahraanka ee Kanada.



Shabakad ururada bulshada  
ah oo 150 urur ka kooban  
ayaa bixisa fursado qofku  
uu kaga qaybqaadan  
karo hawlahaa isboortiga,  
madadaalada, dhaqanka iyo  
waxbarashada.




Edmonton waxay ka mid tahay  
magaalooyinka Kanada ugu  
cadceed badan waxayna heshaa  
2,300 oo saacadood oo qorrax  
ah sanadkiiba iyo hilladda 17  
saacadood oo qorrax ah maalinta  
xagaaga ugu dheer ee Juun  
21keeda.

## WADASHAQAYN ADI DARTAA AH

02

### 3da Heer ee Dawladda



## ADEEGYADA DAWLADDA HOOSE

*Si aad u ogaato adeegyada degmada ama haddii aad wax su'aal ah qabto booqo [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) ama la xidhiidh 311. Kuwani waa qaybo ka mid ah adeegga ay Magaalada Edmonton bixiso:*

### Amniga

Waxay bixisaa adeegyada booliska iyo dabdamiska, duufanka iyo nadaafadda bullaacadda, adeegga degdegga ah iyo kuwa masiibooinka.

### Jidadka

Waxay dhista oo ay dayactirtaa jidadka, meelaha dadku maro, dariiqa baaskiilada iyo buundooyinka Magaalada Edmonton.

### Gaadiidka

Waxay bixisaa gaadiidka dadweynaha si dadka reer Edmonton ay isugu xidhnaadaan – Gaadiidka Dadweynaha ee Edmonton (GDE) oo basas iyo tareenka fudud isugu jira.

### Madadaalada

Waxay bixisaa barnaamij madadaalo oo ay siiso dadka reer Edmonton da' walba oo ay yihiiin, waxaan ka mid ah baraagaha dabbaasha, jardiinooyinka, goobaha madadaalada ee is huwan iyo garoomada ciyarta.

### Macluumaad

Telefoonka 311 iyo goobta Internetka ee [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) ayaad ka helaysaa macluumaad la xidhiidha dhammaan barnaamijita iyo adeegyada Edmonton.

*Si aad u ogaato wakiilada la doortay kuwa ay yihiiin iyo sida aad ula xidhiidhi kartaba, booqo: bogga Interetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > City Government > Councillors & Mayor*

*La xidhiidh: 311*



## ADEEGYADA DAWLAD GOBOLEEDKA

Macluumaadka adeegyada gobolka waxaad ka helaysaa [www.alberta.ca](http://www.alberta.ca). Kuwani waa qaybo ka mid ah adeegga ay dawladda gobolku bixiso:

### Daryeelka Caafimaadka

Wasaaradda Caafimaadka ee Alberta ayaa dadka reer Alberta siisa adeeg caafimaad oo laga heli karo isbitaalada, rugaha caafimaadka ee dhakhaatiirta iyo Internetka.

### Sharciyada Shaqaalaha

Waxay dejisaa oo ay hirgelisaa sharciyada iyo heerarka shaqada iyo shaqaalaha.

### Adeegga Qiimeyntha Shahaadooyinka ee Caalamiga ah (International Qualifications Assessment Service (IQAS))

Waxay qiimeysaa aqoonsiga waxbarashada ee caalamiga ah waxayna barbardhigtaa heerarka waxbarashada ee Kanada.

*Si aad u ogaato wakiilada la doortay kuwa ay yihiiin iyo sida aad ula xidhiidhi kartaba, booqo: bogga Internetka: [www.assembly.ab.ca](http://www.assembly.ab.ca) > Members of the Legislative Assembly*

### Adeegyada Dadka

Waxay bixiyaan kaalmo dhaqaale oo daryeelka ilmaha iyo taageero dakhli ah.

### Ruqsada Gaadhi Wadida

Waxay bixisaa ruqsadda gaadhi wadida waxayna diiwaangelisaa gaadiidka.

### Golaha Sharciidejinta ee Alberta

Waa fadhiga Dawladda Alberta oo ku yaala magaalo madaxda gobolka ee Edmonton. Safarro-macluumaad dadweynaha loogu talagalay ayaa diyaar ah.

Bogga Internetka: [www.assembly.ab.ca](http://www.assembly.ab.ca) > visitor information



## DAWLADDA KANADA

Macluumaadka adeegyada Dawladda Kanada [www.servicecanada.gc.ca](http://www.servicecanada.gc.ca). Kuwani waa qaybo ka mid ah adeegga ay dawladda dhexe bixiso:

### Baasaboorada

Waxay Kanadiyaanka siisaa adeegga baasaboorada.

### Addeegga Jinsiyadda iyo Socdaalka ee Kanada

Waxay bixisaa dal-ku-gal booqasho, waxbarasho, shaqo ama Socdaalka Kanada ah iyo dalabyada jinsiyadda, aqoonsiga deganaanshaha rasmiga ah ama ilaaliinta qaxootiga.

### Arimaha Dadka Asalka ah iyo Horumarinta Waqooyiga

Waxay maamushaa cahdiga iyo heshiisyada ismaamulka ee u yaala Dadka Asalka ah iyo Dawladda Kanada, iyo dhulka iyo ilaha dhaqaale ee degaanada Waqooyiga Kanada.

*Si aad u ogaato wakiilada la doortay kuwa ay yihiiin iyo sida aad ula xidhiidhi kartaba, booqo: bogga Internetka: [www.parl.gc.ca](http://www.parl.gc.ca) > Senators & Members > Members of Parliament*

### Lambarada Caymiska Bulshada

Si uu uga shaqeeyo Kanada, qof walba wuxuu u baahan yahay Lambarka Caymiska Bulshada (SIN).

### Canshuurta Macaashka

Hay'adda Dakhliga ee Kanada waxay muwaadhiniinta oo dhan ka uruurisaa canshuuraha macaashka sanadlahaa ah.

### Aqalka Baarlamaanka

Aqalka Baarlamaanku waa fadhiga dawladda dhexe oo ku yaala caasimadda dalka ee Ottawa, Ontario. Safarro-macluumaad dadweynaha loogu talagalay ayaa diyaar ah.

## HELIDDA MACLUUMAADKA

# 03



10

Marka ugu horraysa ee aad Edmonton timaado, hay'adahan hoos ku qoran ayaa kaa caawinaya sidii aad u heli lahayd macluumaadka aad u baahan tahay.

### MAGAALADA EDMONTON

#### XARUNTA MACLUUMAADKA DADWEYNAHA IYO DADKA CUSUB

Waxay ku taalaa irridda koonfureed ee xarunta Dawladda Hoose oo cinwaankeeda yahay - #1 Churchill Square. Waxay furan tahay 9:00 a.m. – 5:00 p.m. Isninta ilaa Jimcaha, waxayna noqon kartaa meesha ugu horraysa ee aad ka hesho macluumaad ku saabsan: adeegyada degmada, adeegyada dadweynaha, waxbarasha, guriyeenta, beeraha nasashada, madadaalada, dib u warshadaynta , dejinta, adeegga dadka da'da ah, gaadiidka iyo kuwa kale oo badan.

*Bogga Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Programs & Services > for New Residents > and New Arrival Information Centre*

#### ADEEGYADA MAGAALADA: 311

Kala xidhiidh telefoonka lambarkiisu yahay 311, oo diyaar kuu ah 24 saacad maalin walba, si aad u hesho macluumaadka adeegyada ama barnaamijta magaalada Edmonton. Waxaa diyaar ah tarjumaadda in ka badan 100 luuqadood. Haddii

aadan ku hadlin afka Ingiriiska, waxaad sheegtaa luuqaddaada hawlbadaha 311 ayaa tarjumaan ku caawiya ku xidhaya telefoonka.

Haddii aad ku sugar tahay meel ka baxsan Edmonton, dir telefoonka 780-442-5311 si aad ula hadashid adeegga 311.

Kuwani waa qaar ka mid ah meelaha kaa caawin kara inaad hesho wax kasta oo aad u baahan tahay Edmonton dhexdeeda.

#### SHABAKADDAA CAAWIMAADDA: 211

La xidhiidh telefoonka lambarkiisu yahay 211 wakhtigii aad doonto, 24 saac maalin walba si aad u hesho adeegga caafimaadka iyo kan dadka, adeegga bulshada, iyo taageerada dawladda, sida:

- baahiyaha aasaasiga ah (cunto, dhar, hoy iyo taageero dhaqaale),
- addeegga shaqada,
- taageerada waalidka,
- kooxaha la talinta ama taageeridda, iyo
- addeegga dadkii dalka loogu yimid, kuwa cusub, caruurta, dhalinyarada iyo haweenka.

## Bogga Internetka ee Magaalada Edmonton: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca)

Bogga Internetka ee magaalada Edmonton wuxuu ku siinayaa macluumaaad ku saabsan barnaamijta iyo addeegga magaalada Edmonton. Kalandarka iyo jadwalka dhacdooyinka ayaa kugu caawin doonaa inaad lug ku yeelato bulshadaada cusub. Baraha waxtarka leh waxaa ka mid ah:

### Shaqooyinka Magaalada Edmonton

Waxaad ka helaysaa jagada ama shaqada bannaan, arji Internetka ah iyo tilmaamo siyaabaha kale ee shaqo looga codsado magaalada Edmonton.

[www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > City Government > Jobs - Talent Hub

### Bogga Xaafadaha

Waxaad ka helaysaa macluumaaadka xaafadaha Edmonton oo dhan.

[www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Residential & Neighbourhoods

### Maab Jawaab Celiye ah

Wuxuu kaa caawinayaa inaad ogaato xarumaha dab damiska, saldhigyada booliska, boosteejooyinka basaska, barkadaha dabbaasha, garoomada ciyaaraaha, jardiinooyinka iyo meelo caruurtu ay ku ciyaaraan oo biyo soo tuuraya ee xaafaddaada ama meel kasta oo magalaada ka mid ah.

[www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Residential & Neighbourhoods > Neighbourhood Map

## Sida loo Isticmaalo barta Internetka ee magaalada Edmonton

Barta Internetka ee magaalada Edmonton waa [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca). Boggayaga Internetka waxaad ka heli kartaa macluumaaad badan oo muhiim ah.

Rogrog fallaadha hoos u jeedda ee dhinaca bidix si aad u aragto liiska adeegga magaalada

Isticmaal sanduuqa baadhaha ee dusha sare ee bogga hore si aad macluumaaad u raadiso.

Ka eeg dhinaca midig ee bogga dhacdooyinkii u dambeeyey, wararka iyo qoraalada warbaahinta bulshada.

Mararka qaarkood hoggaanka dadka cusub, waxaad ku arkaysaa tilmaamaha macluumaaad gaar ah sida ku xusan bartan Internetka:

[www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Attractions and Events

Kuwani waa tilmaamo ku saabsan sida aad ku helayo bogga aad u baahan tahay ee bartan Internetka ah. Tusaalahan, waxaad tagtaa bogga hore, dabadeed guji meesha cawlan ee ay ku qoran yihin Soojiidasho iyo Dhacdooyin ee dusha sare ah.

Si aad u hesho liiska tooska ah ee addeegyada Magaalada ee ku qoran hoggaankan, booqo:  
[www.edmonton.ca/welcome](http://www.edmonton.ca/welcome)



Meelo badan oo magaalada dhexdeeda ah ayey ku taalaa **Maktabadda Dadweynaha ee Edmonton**. Dadka deggan Edmonton oo dhan bilaash ayey xubin uga noqon karaan Maktabadda. Maktabaduhu waa ilaha ugu fiican ee laga helo maclummaad badan oo bulshada ku saabsan sida buugaag, filimada ama muusig, isticmaalka Internetka iyo barnamijita bulshada.

Agab luuqado kala duwan ku qoran ayaa laga helaa. Dadweynuhu way soo booqan karaan dhammaan Maktabadaha Dadweynaha ee Edmonton. Si aad u qaadato agabka maktabadda, waxaad u baahan tahay inaad leedahay kaadhka ka mid ahaanshaha oo bilaash ah. Si aad u hesho kaadhka ka mid ahaanshaha waa inaad tusto aqoonsi tusaya cinwaanka gurigaaga.

*Barta Internetka: [www.epl.ca](http://www.epl.ca)*

### **Addeegyada Maktabadda waxaa ka mid ah:**

- Kombuyuter iyo Internet
- Buugaag Internetka ah, joornaalo iyo kuwa kale
- Filimada
- Muusig
- Barnamijita dadkii dalka loogu yimid, dhacdooyin iyo buugaag
- Addeegyada dib u dejinta (meelaha qaarkood)
- Barnamijyada dadka baranaya luuqadda Ingiriiska
- Alaab luuqado kala duwan ku qoran
- Adeegyo badan oo kala duwan oo loogu talagalay dadka naafada ah

### **Adeegayaasha Maktabadda ee Beesha**

Maktabadda Dadweynaha Edmonton waxaa jooga shaqaale u shaqeeya bulshada oo kaa caawinaya sidii aad u heli lahayd maclummaadka iyo warka ku saabsan dhacdooyinka la xidhiidha dhaqanka iyo barnamijita loogu talagalay dadka cusub.

### **Adeegga Dib-u-dejinta ee Maktabadda Dhexdeeda**

Qaar ka mid ah laamaha Maktabadaha Dadweynaha ee Edmonton waxaa jooga shaqaale ka socda Hay'adda Addeegga Dadka soo Galootiga ah.

*Barta Internetka: [> Services and programs > In-library Settlement Services](http://www.eisa-edmonton.org)*

### **Adeegaha Maktabadda ee Dadkii Dalka loogu Yimid**

Maktabadaha Dadweynaha ee Edmonton waxaa jooga adeege ku hawlan hawlaha dadkii dalka loogu yimid si uu u sahlo helidda, uruurinta iyo dhacdooyinka.

*Barta Internetka: [> Interests > Aboriginal Peoples](http://www.epl.ca)*

**MAKTABADDA DADWEYNHA EE EDMONTON (MDE) ————— EDMONTON PUBLIC LIBRARY (EPL)**

### **Laamaha Maktabadda Dadweynaha ee Edmonton waxay ku kala yaalaan:**

#### **Abbotsfield-Penny**

**McKee**  
3210 – 118 Avenue

**Calder**  
Kensington Shopping Centre, 12522 – 132 Avenue

**Capilano**  
201, Capilano Mall, 5004 – 98 Avenue

**Castle Downs**  
15379 Castle Downs Road

**Clareview**  
3804 – 139 Avenue

**Highlands**  
6710 – 118 Avenue

**Idylwylde (Bonnie Doon)**  
8310 – 88 Avenue

**Jasper Place**  
9010 – 156 Street

**Lois Hole**  
17650 – 69 Avenue

**Londonderry**  
110, Londonderry Mall, 137 Avenue and 66 Street

#### **Mill Woods**

**601, Mill Woods Town Centre,**  
**2331 – 66 Street**

**Riverbend**  
460 Riverbend Square, Rabbit Hill Road, Terwillegar Drive

**Sprucewood**  
11555 – 95 Street

**Stanley A. Milner**  
7 Sir Winston Churchill Square

**Strathcona**  
8331 – 104 Street

**Whitemud Crossing**  
45, Whitemud Crossing Shopping Centre, 4211 – 106 Street

**Woodcroft**  
13420 – 114 Avenue





## DEGIDDA EDMONTON

# 04

Hay'adahani waxay dadka Kanada ku cusub siiyan taageero iyo adeeg dib-u-dejineed, iyo barnaamij waxbarasho, adeeg turjumaad, barnaamij shaqo iyo kuwa kale.

### XARUNTA MUWAADHINIINTA IYO WARGELINTA DADKA **CUSUB (CITIZEN AND NEW ARRIVAL INFORMATION CENTRE)**

Xaruntani dadka cusub ayey macluumaad siisaa. Haddii aadan Ingiriis ku hadlin turjumaan ayaa laguugu yeedhayaa.

*Barta Internetka [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca)  
> For Residents > Resident Programs  
> New Resident Programs > Citizen and New Arrival Information Centre*

# ADEEGGA DEJINTA

**Adeegga waxaa lagu bixiyaa Ingiriis, Faransiis iyo luuqado kale oo badan.**

14



## Falka Caafimaadka Bulshada (Action for Healthy Communities)

Telefoon: (780) 944-4687  
Cinwaanka: #200, 10578 -113 St. NW  
*Bogga Internetka: [www.a4hc.ca](http://www.a4hc.ca)*

## Alliance Jeunesse Famille de l'Alberta Society

Telefoon: 780-440-2621  
Cinwaanka: 8925 - 82 Avenue,  
Bureau 12  
*Bogga Internetka: [www.ajfas.ca](http://www.ajfas.ca)*

## ASSIST Community Services Centre (Downtown) (Xarunta Adeegga Bulshada ee ASSIST (Faras Magaalka)

Telefoon: 780-429-3111  
Cinwaanka: 9649 - 105A Avenue  
*Bogga Internetka: [www.assistcsc.org](http://www.assistcsc.org)*

## ASSIST Community Services Centre (Southwest) (Xarunta Adeegga Bulshada ee ASSIST (Koonfur Galbeed)

Telefoon: 780-429-3119  
Cinwaanka: Unit 2, 810 Saddleback Road, NW  
*Bogga Internetka: [www.assistcsc.org](http://www.assistcsc.org)*

## L'association de tous les francoTelefoons de l'Alberta

Telefoon: 780-469-4401  
Cinwaanka: 8627 rue Marie-Anne Gaboury, Bureau 30  
*Bogga Internetka: [www.acfa.ab.ca](http://www.acfa.ab.ca)*

## Catholic Social Services (Adeegga Bulshada ee Kootaliiga)

Socdaalka iyo Adeegga Dejinta iyo taageerada shaqaalaha qalaad ee ku meel-gaadhka ah.  
Telefoon: 780-424-3545  
Cinwaanka: 10709 - 105 St.  
*Bogga Internetka: [www.cssalberta.ca](http://www.cssalberta.ca)*

## Centre d'accueil et d'établissement Alberta-Nord

Telefoon: 780-669-6004  
Cinwaanka: 8627, rue Marie-Anne Gaboury, bureau 108  
*Bogga Internetka: [www.lecae.ca](http://www.lecae.ca)*

## Changing Together: A Centre for Immigrant Women (Baddel si Wadajir: Xarunta Dumarka Dalka ku cusub)

Telefoon: 780-421-0175  
Cinwaanka: 9538 - 107 Avenue  
*Bogga Internetka: [www.changingtogether.com](http://www.changingtogether.com)*

## Edmonton Immigrant Services Association (Ha'yadda Adeegga dadka cusub ee Edmonton)

Telefoon: 780-474-8445  
Cinwaanka: Suite #201, 10720 - 113 St.  
*Bogga Internetka: [www.eisa-edmonton.org](http://www.eisa-edmonton.org)*

## Edmonton Mennonite Centre for Newcomers (Xarunta Dadka Cusub ee Mennonaytka Edmonton)

Telefoon: 780-424-7709  
Cinwaanka: 11713, 82e Rue  
*Bogga Internetka: [www.emcn.ab.ca](http://www.emcn.ab.ca)*

## Immigration, Refugee and Citizenship Canada (Wasaaradda Socdaalka, Qaxootiga and Jinsiyadda ee Canada)

Wixii macluumaa ah ee ku saabsan jinsiyadda iyo socdaalka Kanada oo ay ku jiraan dal-ku-gal booqasho, waxbarasho, shaqo ama u guurid Kanada iyo codsiyada dhalashada, kaadhka deganaanshaha joogtada ah ama ilaalinta qaxootiga waxaad ka helaysaa:

*Bogga Internetka: [www.cic.gc.ca](http://www.cic.gc.ca)*

## Islamic Family and Social Service Association (Ururka Qoyska iyo Adeegga Bulshada ee Islaamiga ah)

Telefoon: 780-430-9220  
Cinwaan: Suite 85, 4003 - 98 Street  
*Bogga Internetka: [www.ifssa.ca](http://www.ifssa.ca)*

## Multicultural Health Brokers Co-op (Iskaashatada Caafimaadka ee Isku-dhafka ah)

Telefoon: 780-423-1973  
Cinwaanka: 9538 - 107 Avenue  
*Bogga Internetka: [www.mchb.org](http://www.mchb.org)*

## Temporary Foreign Workers Advisory Office (Xafiiska la Talinta Shaqaalaha Qalaad ee ku Meelgaadhka ah)

Xafiiskani wuxuu caawiyaa shaqaalaha qalaad ee sida ku meelgaadhka Kanada uga shaqeeya si ay u ogaadaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda, iyo si ay xal iyo jawaabo ugu helaan dhibaatooyinka iyo su'aalahooda. Xafiiska la talintu wuxuu ku caawiyaa foomamka, helidda adeegga tarjumaadda, cabasho soo gudbinta iyo helidda adeegga.

Telefoon: 780-644-2584

## Khadka Caawinta Shaqaalaha ee Ku Meelgaadhka ah:

Telefoon: 1-877-944-9955  
Cinwaanka: 2nd Floor, 10242 – 105 St.  
Email: [tfwadvisory.office@gov.ab.ca](mailto:tfwadvisory.office@gov.ab.ca)

## Centre d'accueil pour les immigrants (Welcome Centre for Immigrants )

Telefoon: 780-462-6924  
Cinwaan: #200, Tower 2, 3699 Millwoods Road  
*Bogga Internetka: [www.wciedmonton.ca](http://www.wciedmonton.ca)*

## ADEEGGA TARJUMAADDA

### Adeegga Tarjumaadda Association of Translators and Interpreters of Alberta (Ururka Tarjumaanada ee Alberta)

Telefoon: 780-434-8384

Telefoon Blлаash ah: 1-888-434-2842

Bogga Internetka: [www.atia.ab.ca](http://www.atia.ab.ca)

### Edmonton Immigrant Services Association (EISA) (Ururka Adeegga dadka Cusub ee Edmonton)

Telefoon: 780-474-8445

Cinwaan: 201, 10720 - 113 Street

Bogga Internetka: [www.eisa-edmonton.org](http://www.eisa-edmonton.org)

### The Family Centre (Xarunta Qoyska)

Centralized Interpreter Services (CIS) (Xarunta Dhexe ee Adeegga Tarjumaadda)

Telefoon: 780-448 -2627

Cinwaan: 20, 9912 – 106 St.

Bogga Internetka: [www.the-family-centre.com](http://www.the-family-centre.com)

### Multicultural Women and Seniors Services Association (Ururka Adeegga Haweenka iyo Duqayda ee Iskudhafka ah)

Adeegga tarjumaadda ee Bengali, Hindi, Punjabi iyo Urdu

Telefoon: 780-465-2992

Bogga Internetka: [www.mwssa.org](http://www.mwssa.org)

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN ADEEGGA DEJINTA

### Maabka Alberta iyo Xarunta Gobalka ee Edmonton iyo khariiradda bulshada

Boggan Internetka waxaad ka helaysaa liis faahfaahsan iyo maabab dadka cusub haga.

Bogga Internetka: [www.mapsab.ca](http://www.mapsab.ca) > Social Atlases > City of Edmonton Social Atlas > Section 5 > Newcomers

### 211 Edmonton

Boggan Internetka waxaad ka helaysaa liis faahfaahsan iyo maabab dadka cusub haga

Téléphone: 211

Bogga Internetka: [www.211edmonton.com](http://www.211edmonton.com) > 211 resources and directories > resource list for newcomers to Canada



ISU SOCODKA  
EDMONTON

# 05

## JIDADKA (STREETS) IYO WADDOOYINKA (AVENUES)

Badanaa jidadka Edmonton waxay leeyihiin lambarro. Waddooyinku (Avenues) waxay u kala socdaan bari iyo galbeed meesha jidadku (streets) ay u kala socdaan waqooyi iyo koonfur. Cinwaanka ayaad ka fahmaysaa macnaha.

Tusaale, 6812 – 101 Avenue waa jidka 68aad (labada lambar ee cinwaanka u horreeya) iyo wadada 101aad.

Xaafadaha cusubi waxay leeyihiin jidad magacyo leh. Khariidada Edmonton ayaa ku caawin karta. Khariidada waxaad ka iibsan kartaa kaalmaha shidaalka, dukaamada ama waxaad ka heli kartaa Internetka. Khariirdada Internetka sida maabka Google ayaad ka heli kartaa goobta aad raadinayso iyo jihooinka markaad meel ka timaaddo ee aad meel kale u socoto.

Bogga Internetka: [www.googlemaps.com](http://www.googlemaps.com)



## GAADIIDKA DAD WEYNAHA

Basaska iyo tareenada Edmonton ayaa meeshaad doonto ku gaynaya. Basaska Dad Weynahu waxay tagaan inta badan xaafadaha magaalada waxayna isku xidhaan magaalada iyo degaanada dariska la ah sida St. Albert ama Sherwood Park.

Tareenka fudud (LRT) wuxuu leeyahay laba khad oo u kala socda wayooyi iyo koonfur. Khadka kowaad waxaa la yidhaahdaa Capital Line, wuxuuna kasoo baxaa boosteejada Clareview (48 Street and 139 Avenue) wuxuuna tagaa boosteejada Century Park (111 Street and 23 Avenue). Khadka labaad waxaa la yidhaahdaa Metro Line wuxuuna ka baxaa NAIT (1 Kingsway Avenue and 105 Street) wuxuuna tagaa boosteejada Century Park saacadaha mashquulka, iyo boosteejada Health Sciences/Jubilee (114 Street and 83 Avenue) marka aanu mashquul badan jirin.

Si aad u ogaato qiimaha bas raaca, jadwalka basaska iyo waddooyinka, ama si aad wax uga ogaato sida loo isticmaalo gaadiidka dad weynaha la xidhiidh telefoonka lambarkiisu yahay 311, dabadeedna riix 1 oo ah maclumaadka gaadiidka dad weynaha ama booqo bogga Internetka ee [www.takeets.com](http://www.takeets.com).

## BAS RAACA

Waxaad ku bixn kartaa bas raaca lacag caddaan ah, tigidhida baska ama bas dhaafka iyada oo ay ku xidhan tahay baahidaada. Hal bas raac (caddaan ama tigidhka baska) wuxuu kuu ogolaanayaan inaad raacdo dhawr bas ama tareen saacad iyo badh gudahood. Haddii ay tahay inaad raacdo hal bas wax ka badan ama aad bas ka degto oo aad tareenka fudud ku wareegto xilligaa dhexdiisa darawalka weydiiso in uu ku siiyo rar-wareejin.

## BAS DHAAF BILLE AH (BAS IYO TAREEN)

Waxaad heli kartaa bas dhaaf bille ah iyo tigidho, waxa sidoo kale dadka qaangaadhka ah, kuwa dakhligoodu uu hooseeyo ama curyaamiintu ay heli karaan bas dhaaf jaban oo sanadle ah. Barta Internetka ee ETS ayaad faahfaahinta iyo sicirka xilligaa ka helaysaa.

Barta Internetka: [www.takeets.com](http://www.takeets.com)

Haddii aad raacdo LRTga (tareenka) waa inaad mar walba wadato bas dhaafka billeha ah, tigidh ama rar-wareejin sax ah. Tigidhka baska waa inuu duleeliyo mid ka mid ah ansixiyayaasha huruudda ah ee yaala irridda agteeda si ay caddayn ugu noqoto inaad bixisay tareen raaci. Waxaa jira waxyaalo badan oo waxtar leh kuwaa oo kaa caawinaya

qorshaynta safarkaaga ee basaska ETS iyo LRT tareenka oo aad ka heli karto barta Internetka ee ETS. Waxaad kala soo bixi kartaa ababka ETS adigoo kusoo dejisanaya qalabkaaga elektaroonka ah.

## XIDHIIDHINTA BASASKA

Boosteejo walba waxay leedahay lambar kaa oo ku xusan calaamadda bas joogsiga. Barta Internetkana waad ka heli kartaa. Haddii aad wacdo xidhiidhka baska dabadeed aad galiso lambarka boosteejada, waxay ku siinaysaa xillyada basaska.

Telefoon: 780-496-1600

## ADEEGGA GAADIIDKA

### CURYAAMIINTA QAANGAADHKA AH (DATS)

Basaska DATS waxaa loogu talagalay dadka curyaamiinta ah. Haddii aad isticmaasho kursiga curyaamiinta ama aad bakoorad ku luuddo, waxaad balansan kartaa baska DATS si uu kuu qaado, kuu geeyo meesha aad u baahan tahay kuuna soo celiyo. Waxaa waajib ah inaad horay isu diiwaangaliso. DATS waxaa maamula Laanta Adeegga Gaadiidka Dad Weynaha ee Edmonton (ETS).

Telefoon: 780-496-4567

Barta Internetka: [www.edmonton.ca>Transportation > ETS \(Edmonton Transit System\) > DATS](http://www.edmonton.ca>Transportation > ETS (Edmonton Transit System) > DATS)



## Waxyaalaha aad u baahan tahay si aad gaadhi ugu dhex wado Edmonton

Si aad u waddo gaadhi gaar ah, gaadhiga xamuulka ama gawaadhida kale waa in aad haysato:

- Ruqsada gaadhi wadida oo sax ah
- Caymiska gaadhiga, iyo
- Diiwaangelinta gaadhiga.

Waxaa waajib kugu ah in aad wadato caddaymahaa oo dhan marka aad gaadhi wadayo.

## RUQSADA GAADHIWADIDA EE ALBERTA

Waxaa jira noocyoo kala duwan oo ah ruqsada gaadhi wadida iyada oo ay ku xidhan tahay nooca gaadhiga iyo ujeedada gaadhiwadida. Haddii aad doonayso in aad waddo tagsi, basaska yaryar ee shacabka ama gawaadhida gurmadka degdega ah adoo ku shaqaynaya, waxaad u baahan tahay nooc ka duwan nooca aad ku waddo gawaadhida gaarka ah. Dadka Alberta ku cusub waxay haystaan 90 maalmood si ay ruqsada gaadhi wadida ugu badashaan midda Alberta. Waa in aad tagto xarunta diiwaangalinta si aad u qaadatid ruqsada gaadhi wadida. Waxaad ka heli kartaa Buugga Huruudda ah ee telefoonada lagu qoro dhinaca Ruqsada Gaadhiwadida iyo Adeegga Diiwaangalinta. Si aad u hesho liiska diiwaanadda la xidhiidh:

### Adeegga Alberta (Service Alberta)

Telefoon: 780-310-0000 (telefoon bilaash ah meel kasta oo Alberta ah) 780-427-2711 (Alberta dibadeeda)

Barta Internetka: [www.servicealberta.ca](http://www.servicealberta.ca) > Drivers/Vehicles > Driver's Licence

## CAYMISKA GAADHIGA

Waxaa jira noocyoo kala duwan oo caymis ah. Nooca caymiska aad u baahan tahay wuxuu ku xidhan yahay in aad gaadhiga si sakhsii ah u isticmaalayso, in aad adeeg u isticmaalayso ama aad ganacsii u isticmaalayso. Shirkadda caymiska waydii nooca caymiska aad u baahan tahay. Alberta waxaa ka jira

shirkado badan oo bixiya adeegga caymiska waxaana ka mid ah Hay'adda Gaadiidka ee Alberta (Alberta Motor Association - AMA), bangiyada, ururada daynta iyo shirkadaha caymiska gaarka ah. Halkan ayaad ka helaysaa liistada shirkadaha caymiska

Barta Internetka: [www.airb.alberta.ca](http://www.airb.alberta.ca) > For Drivers > Insurance Providers

## DIIWAANGELINTA GAWAADHIDA EE ALBERTA

Waa in aad haysato ruqsada gaadhi wadida si aad caymis u hesho, waana inaad haysato caymiska gaadhiga si aad u diiwaangeliso gaadhiga. 90 maalmood gudahood waa in dadka gobolka ku cusubi ay ku diiwaangeliyaan gawaadhida aan ganacsiga ahayn ee gobol kale ka yimid.

Waxaad gaadhigaaga ka diiwaangelin kartaa xarun kasta oo ka mid ah xarumaha diiwaangalinta gawaadhida ee Alberta. Si aad u hesho liistada xarumaha diiwaangalinta ee Alberta oo dhammaystiran booqo::

Barta Internetka: [www.servicealberta.ca](http://www.servicealberta.ca) > Registries

## TABABARKA DARAWALKA

Si aad u qaadato ruqsada gaadhi wadida waxaa suuragal ah in aad u baahato in aad gasho tababar. Edmonton waxaa laga helaa barnaamijyo badan oo gaar ah oo tababara darawalka. Si aad u hesho mid, Internetka ka raadi "driver training in Edmonton".

## **Hay'adda Gaadiidka ee Alberta (The Alberta Motor Association (AMA))**

AMA du waa urur faa'iidooyin badan u leh darawalka. Waxaa laga helaa barnaamij waxbarasho, kuwa imitixaanka gaadhi wadida, caymiska gawaadhida iyo guryaha, diiwaangeliye iyo waliba gargaar degdeg ah oo ay siiso darawalka haddii gaadhigu ka xumaado, khariirad bilaash ah iyo adeeg kale. Waa in aad xubin ka tahay AMA da si aad adeeggeeda u hesho.

Telefoon: 780-430-7700

Barta Internetka: [www.ama.ab.ca](http://www.ama.ab.ca)

### **Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan gaadhi wadida Edmonton booqo Wasaaradda Gaadiidka ee Alberta**

Barta Internetka: [www.transportation.alberta.ca](http://www.transportation.alberta.ca) > Drivers and Vehicles

## **GAADHI WADIDA XILLIGA JIILAALKA (QABOOBAHA)**

Gaadhi wadidu xilliga qaboobaha aad ayey u adag tahay. Jidku waa baraf simbiririxo ah, si dhib yar ayuuna gaadhigu xadhkaha u goosan karaa oo uu darawalka ula baxsan karaa. Aayar soco, wakhti hore soo bax si aad u gaadho meesha aad u socoto, gaadhiga kaa horreeya masaafo fiican ka dambee, shaagagga jiilaalka loogu talagalay gaadhiga ku xidho. Shaagagga jiilaalku waxay ka hortagayaan weecweecashada iyo baxsashada gaadhiga iyo in aanu gaadhigu ku xannibmin barafka dhexdiisa. Waxaa kuu fiican inaad qaadato koorso gaadhi wadida jiilaalka ah.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan koorsooyinka gaadhi wadida jiilaalka booqo:

### **Hay'adda Gaadiidka ee Alberta (Alberta Motor Association (AMA))**

Barta Internetka: [www.ama.ab.ca](http://www.ama.ab.ca)

## **MACLUUMAAD MUHIIM AH OO KU SAABSAN GAADHI WADIDA ALBERTA**

**Sharchiyada** - Darawalku waa inuu yaqaano kuna dhaqmo sharchiyada gaadhi wadida. Booliska ama saraakiisha nabadda ayaa ganaaxi kara darawalkii jabiya sharchiyada gaadhi wadida. Buug gacmeed sharxaya sharchiyada gaadhi wadida ayaa laga helaa xarumaha diiwaangelinta ama [www.transportation.alberta.ca](http://www.transportation.alberta.ca) > Driver Guides..


**Suunka Gaadhiga** – Sharciga Alberta waxaa qof walba waajib ku ah in uu xidho suunka gaadhiga. Caruurta miisaankoodu uu ka yar yahay 18kg (40lbs) waa in lagu xidho kursiga badbaadada kaa oo ah mid sharciga waafaqsan si wanaagsanna loo rakibay.

**Khamrada** – Waa sharcidarro in aad khamro cabto, ama ay dhalo khamro ah oo furan gaadhiga kuu dhex taalo, ama aad gaadhiga waddo adiga oo sarkhaansan. Waa dambi halis ah Kanada dhexdeeda inaad adiga oo cabsan gaadhiga waddo. Waa lagu ganaaxi karaa ama


ruqsada gaadhi wadida ayaa lagaa qaadi karaa haddii aad gasho dambi noocan ah.

**Jeedinta (ama Mashquulinta) Darawalka** – Waa sharcidarro in la isticmaalo telefoonka gacanta ama qalabka kale ee elektanoonigga ah marka qofku uu gaadhiga wado Alberta dhexdeeda. Si aad telefoon gacmeedkaaga ugu hadasho adoo gaadhi wada, waa in aad leedadahay qalabka aad ku hadli karto adoo u gacan-bannaan wadida gaadhiga. Jeedinta darawalka waxaa sidoo kale ka mid ah wax akhrinta sida buugaagta ama joornaalada, wax qoridda, wax daabicidda ama wax sawiridda, iyo is qurxinta sida shanlaysiga, is nuurnuurinta ama cadayashada.

**Gawaadhida gargaarka degdeggaa ah** – Haddii aad aragto ama maqasho gaadhi boolis, ambalaas ama dabdamis ah oo nalka ama dhawaaqa degdeggaa ahi u shidan yahay, wadada midig uga bax oo sida ugu dhaqsaha badan ee suuragalka ah u istaag.



## BAASKIILKA & LUGTA



### BAASKIILKA

Baaskiilku waa fursad fiican oo Edmonton lagu dhex mari karo. Magaaladu waxay shacabkeeda ku dhiirigelisaa in ay isticmaalaan baaskiilka maxaa yeelay baaskiilku waa wax la awoodi karo caafimaadkana u fiican. Magaalada Edmonton waxay leedahay surimmo kala duwan oo ay baaskiiladu maraan kuwaa oo kaa caawinaya in aad magaalada dhex mushaaxdo. Waxaa la qorsheeyey in mustaqbalka lagu kordhiyo surimmo kale oo baaskiil.

Inta aadan dhaqaajinin, dulmar sharciyada jidadka kalana baro nalalka iyo calaamadaha jidadka. Booqo [edmonton.ca/bikeedmonton](http://edmonton.ca/bikeedmonton) si aad wax uga ogaato nababdalyada baaskiilka, u aragto khariidadaha baaskiilka aadna u hesho macluumaa dheeri ah oo ku saabsan baaskiil wadida.

Telefoon: 311

Barta Internetka: [> Driving, walking & cycling > Bike Edmonton](http://www.edmonton.ca)

### LUGAYNTA

Lugayntu waxay bulshada ku kordhisaa tamar iyo badhaadhe. Qofka lugeeya wuxuu la kulmaa dariska, wuxuu hellaa jimicsi ama dhaqdhaqaaq caafimaad, wuxuu booodaa dukaamada deriska ah, wuxuuna ku raaxaystaa goobaha caamka ah. Waxaa kale oo uu noqdaa indhaha bulshada taa oo kor u qaadda nababdelyada guud, dambiyadana yaraysa. Magaalada Edmonton waxay dhiirigelisaa lugaynta, jidh dhiska iyo ku raaxaysiga magaalada si qofka caafimaadkiisu u fiicnaado. Si aad fikrad uga hesho lugaynta, jidh dhiska iyo ku raaxaysiga nolosha magaalada, qaado khariidadaha lugaynta ku saabsan ee laga heli karo maktabadaha dad weynaha ee xaafadaada ama booqo lug-ku-habboonida Edmonton:

Barta Internetka: [> Transportation > Cycling & Walking > Walking](http://www.edmonton.ca)

## NOLOSHA EDMONTON

# 06

## GURYAH A



Guryaha Edmonton waxaa ka mid ah kuwo qoys kaliya loogu talagay, kuwo la kiraysto oo dhisme weyn ka mid ah, kuwo la iibsado oo dhisme weyn ka mid ah iyo kuwo sakad ah oo lana kiraysto lana iibsan karo.

### IIBSASHADA GURYAH A

Haddii aad doonayso in aad guri iibsato, waxaa kuu fiican in aad la xidhiidho mid ka mid ah wakiilada guryaha iibiya.

Barta Internetka ee Golaha Gurya libinta Edmonton ayaad ka baadhi kartaa wakiilada guryaha iibiya.

*Barta Internetka : [www.ereb.com](http://www.ereb.com) > Buying a Home > Finding a Realtor*

\*Markaad guri iibsato waa in aad bixiso canshuurta hantida. Cinwaanada hoose ee Maamulka Lacagta iyo Canshuuraha ayaad ka helaysaa maclummaad badan

### KIRAYSIGA GURYAH A

Si aad u hesho guryaha ijaarka ah, fiiri xayesiiska joornaalada, Internetka ama calaamadaha guryaha lagu dhajiyoo ama hortoodo la dhigo ee ay ku qoran tahay "waa ijaar."

Markaad hesho guri ijaar ah, waxaa suuragal ah in loo baahdo in aad buuxiso arji aadna bixiso deebaaji u dhigma bil ijaarkeed. Deebaajigu waa lacag ilaalinaya xaqaaga iyo xaqa qofka hantiilaha ah. Haddii aad deebaaji bixiso, hantiiluhu guriga cid kale kama ijaari karo. Hantiilaha ayaa haynaya deebaajiga ilaa aad ka guurayso. Haddii aad guriga wax ka jabiso ama ka xumayso deebaajiga ayaa laga jarayaa oo laga samaynayaa wixii aad halaysay.

Inta aadan wali degin iyo marka aad ka guuraysaba hantiilaha weydii in uu guriga kula kormeero si aad u hubisaan xaaladda guriga warbixin qoranna aad u hesho. Nuqul kala hadh waxbixinta qoran. Warbixitan qoran ayaa la fiirinayaa si loo hubiyo in xaaladda gurigu ay tahay sidii markii aad soo degtay ay ahayd. Warbixintan qoran ayaa lagu salaynayaa deebaajigaaga inta lagaa goynayo si loo hagaajiyo meelaha aad guriga ka jabisay ama aad ka xumaysay.


Waa in lagu siiyo caddayn qoran oo tusaya in aad bixisay deebaajiga iyo ijarka bil walba. Ijarka guriga xilligii loogu talagalay ku bixi haddii kale waxaa lagugu qasbayaa inaad guriga ka guurto.

Haddii adiga iyo qofka hantiilaha ah aad wax uun isku khilaftaan ama haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan xuquuqdaada iyo xilka ku saaran, la xidhiidh Guddiga la Talinta Kireeyaha iyo Kiraystaha. Kani waa urur loo xilsaaray in uu xalliyo khilaafaadka dhexmara kiraystaha iyo laga kiraystaha.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Programs & Services >  
Housing > Landlord and Tenant Advisory Board*

## **BAAHIDA DEGDEGGA AH EE GURYAHA**

Fiiri Hoyga Haweenka ee ka hooseeya qaybta Nabad ku Noolashaha Edmonton si aad wax uga ogato guryaha degdegga ah ee l oogu talagalay dumarka iyo caruurta ku afoobay dhibaatada qoyska.



### **Adeegga Guryaha ee Magaalada Edmonton**

Waa barnaamij ay Magaaladu maamusho kaa oo la shaqeeya shakhsiyadka, ururada bulshada, qaybaha kale ee dadweynaha, dawladaha kala duwan iyo hay'adaha horumarinta si uu u buuxiyo baahida loo qabo guryaha iyo adeegga la xidhiidha.

Telefoon: 311

### **Barnaamijka Lahaanshaha Guriga u Horreeya**

Waa barnaamij ay magaaladu samaysay oo dadka fursad u siinaya in ay iibsadaan gurigii ugu horreeya ee ay gobolka Alberta ka dhex iibsadaan.

Telefoon: 311

*Barta Internetka: [> Housing > First Place](http://www.edmonton.ca)*

### **Ururka Guryaha Waayeelka ee Alberta (Alberta Senior Citizens Housing Association - ASCHA)**

ASCHA waxaa laga helaa fursado badan oo ah guryaha waayeelka oo ay ka mid yihiin in ka badan 2500 oo guri

oo loogu talagalay waayeelka daryeelka u baahan.

Telefoon: 780-439-6473

*Barta Internetka: [www.ascha.com](http://www.ascha.com)*

### **Shirkadda Guryaha ee Nawaaxiga Magaalo Madaxda (Capital Region Housing Corporation (CRHC))**

Shirkadda Guryaha ee Nawaaxiga Magaalo Madaxda waa shirkadda ugu weyn ee laga helo guryaha dadka danyarta ah loogu talagalay.

Telefoon: 780-420-6161

Khadka Maclumaadka ee CHRC 24-

Saac 780-428-8200

*Barta Internetka: [www.crhc.ca](http://www.crhc.ca)*

### **Xarunta Mennonite ka ee Dadka Cusub ee Edmonton**

Xaruntani waxay caawisaa dadka cusub iyo qaxootiga. Waxay bixisaad adeeg ay ka mid yihiin maclumaad, hanuunin, wareejin, kaalmada aasaasiga ah (caafimaad, kaalmo dadka waaweyn iyo ubadka ah, guryaha, dakhliga iyo mid cuntada la xidhiidha), diiwaangelinta caruurta ee iskuulka, buuxinta foomamka dawladda,

afcelin luuqadaha qaarkood ah iyo maclumaad la xidhiidha socdaalka.

Telefoon: 780-424-7709

*Barta Internetka: [www.emcn.ab.ca](http://www.emcn.ab.ca)*

### **Dejinka Dadka (Habitat for Humanity)**

Guryaha Dejinta waxaa lagu dhisaad iskaa wax u qabsi iyo deeq, waxaan qiime jaban lagaga iibiyaa dadka danyarta ah ee iska bixin kara.

Telefoon: 780-479-3566

*Barta Internetka: [www.hfh.org](http://www.hfh.org)*

### **Barnaamijka Guriga (The Home Program)**

Waxay caawiyaan dadka dakhligoodu uu dhedhexaadka yahay si ay guryo u yeeshaan. Waxay bixiyaan wacyigelin, wareejin, la talin fool-ka-fool ah, caawinta cudhaadha, ku xidhidda xirfadlayaasha guryaha ka shaqeeyaa iyo kaalmo kale oo joogta ah.

Telefoon: 1-877-504-6161

*Barta Internetka: [www.thehomeprogram.ca](http://www.thehomeprogram.ca)*

**LA XIDHIIDH URURADAN HADDII  
AAD RAADINAYSO KAALMO GURI  
AAD IJAARATO AMA AAD U BAAHAN  
TAHAY IN AAD HESHO GURI AAD  
KIRADIISA KA BIXI KARTO.**

## **CAYMI HANTIDAADA**

**Haddii aad guri kiraysato, iibso caymis si hantidaada sida alaabta guriga kuu taala, dharka, walxaha elekteroongiga ah, iwm., aad uga caymiso dab, xatooyo, iwm.**

**Haddii aad guri gadato, iibso caymiska hantida si aad u caymiso hantidaada IYO caymiska hantiilaha ee caymiya guriga.**



# MAAMULKA LACAGTA

## AQOONTA MAALIYADDA

Ururo badan oo reer Edmonton ah ayaa dadka ka caawiya sidii ay u maamuli lahaayeen lacagta soo gasha. Si aad u ogaato meesha aad ka qaadan karto fasal ku saabsan maamulka lacagta, la xidhiidh:

### Ururka Tacliinta Maaliyadda ee Edmonton (The Edmonton Financial Literacy Society (EFLS))

EFLS waxay bixisaa koorsooyin habboon si ay dadku u horumariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin, ma aha kaliya inay ka caawiyaan xagga dhaqaalaha.

Telefoon: 780.944.1558

Barta Internetka: [www.efls.ca](http://www.efls.ca)

### E4C

E4C waa urur samafal oo aan faa'iido doon ahayn oo caawiya dadka nugul si ay ugu waaraan nolol caafimaad qabta.

Telefoon: 780-424-7543

Barta Internetka: [www.e4calberta.org](http://www.e4calberta.org)

## CANSHUURTA HANTIDA

Haddii aad leedahay guri, Magaalada ayaa qiimeynaysa gurigaaga iyo canshuurta ay tahay inaad bixiso.

Miisaaniyadda sanadlahaa ah ee

Magaalada ayaa lagu jaangooyaa

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Activities, Parks & Recreation > Courses & Activities > Community Drop-In Programs > Youth Programs

### Barnaamijyada la tagi karo Dayrta,

#### Jiilaalka iyo Guga

Waa barnamijyo caruurta ay da'doodu u dhaxayso 6-12 sano ay iman karaan..

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Activities, Parks & Recreation > Courses and Programs > Drop-in Community Programs

### Barnaamijyada Xagaaga ee Caruurta

Waa barnamijyo madadaalo oo ay iman karaan caruurta ay da'doodu u dhaxayso 6 – 12 sano..

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Activities, Parks & Recreation > Playgrounds and Spray Decks





Ururo badan oo bulshada u adeega ayaa bixiya adeeg iyo barnaamijyo caruurta iyo dhalinyarada loogu talagalay. Hoos waxaad ka helasaa dhawr kuwaa ka mid ah.

## DARYEELKA CARUURTA

Sharciga Alberta marka la fiiriyo, dayacaad ayey noqon kartaa in aad kaligood guriga kaga tagto carruur ay dadoodu ka yar tahay 12 sano.

Edmonton waxay leedahay meelo badan oo carruurta lagu hayo, kuwo iskuulka ka dib carruurta haya iyo gurya ubadka haya oo ganacsi u furan. Qofku waa in uu jeebkiisa ka bixiyo kharashka ubadka lagu haynayo. Haddii dakhliga qoyskaagu uu hooseeyo waxaad xaq u yeelan kartaa cawimaad dhaqaale oo aad ku bixiso haynta ubadkaaga.

**Macluumaadka la xidhiidha daryeelka caruurta iyo dakhliga lagu caawiyo dadka mudan, la xidhiidh:**

Telefoon: 780-427-0958

All child care facilities in Alberta must be licensed and supervised by trained workers.

Barta Internetka: [www.humanservices.alberta.ca/Programs & Services > Family & Community > Child Care > Child Care Lookup Tool](http://www.humanservices.alberta.ca/Programs-&Services/Family-&Community/Child-Care/Child-Care-Lookup-Tool)

## ADEEGGA DHALLAANKA IYO DHALINYARADA

**Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha ee  
Edmonton Walaalada Waa Weyn**

Telefoon: 780-424-8181

Barta Internetka: [www.bgcbigs.ca](http://www.bgcbigs.ca)

**YMCA (Isu tagga Barbaarta Kirishtaanka ah)**

Caafimaadka, waxbarashada, arimaha bulshada, madadaalada loogu talagalay cid walba.

Telefoon: 780-428-9469

Barta Internetka: [www.northernalberta.ymca.ca](http://www.northernalberta.ymca.ca)

**YWCA (Isu tagga Hablaha Kirishtaanka ah)**

Awood siinta gabdhaha, ka hor tagga rabshadaha, caafimaadka bulshada iyo barnaamijyo loogu talagalay kor u qaadida

awoodda hoggaamineed ee dumarka. Waxay wax u qabtaan cid walba.

Telefoon: 780-428-9469

Barta Internetka: [www.ywcofedmonton.org](http://www.ywcofedmonton.org)

**Jimciyadda Hoy Siinta Degdeegga ah ee  
Dhalinyarada (Youth Emergency Shelter  
Society (YESS))**

Dhalinyarada u baahan hoy ay si nabadvelyo ah ugu noolaadaan ayey hoy siyaan. Waxaa kale oo ay bixiyaan talosiin la xidhiidha daroogada, sharciga iyo adeegga bulshada iyo dhibaatooyin adag ee dhalinyarada qabsada.

Telefoon: 780-468-7070

Barta Internetka: [www.yess.org](http://www.yess.org)



# ADEEGGA IYO BARNAAAMIJYADA WAAYEELKA

## GURYAHA

**Barnaamijyada Guri Siinta**

Telefoon: 311

**Jimciyadda Guriyeynta ee Waayelka  
Alberta)**

Barta Internetka: [www.ascha.com](http://www.ascha.com)

**Jimciyadda Hawlgalka Saaxiibtinimo ee  
Waayelka (badhtamaha magaalada)**

Telefoon: 780-408-2955

Barta Internetka: [www.ofss.org](http://www.ofss.org)

**Jimciyadda Waayelka ee SAGE**

Telefoon: 780-701-9018

Barta Internetka: [www.mysage.ca > Need Help?  
Housing Information](http://www.mysage.ca > Need Help?<br/>Housing Information)

## ADEEGGA TAAGEERADA

**Jooji Waxyeelada Waayelka**

Telefoon: 780 477 2929

Barta Internetka: [www.catholicsocialservices.ab.ca > Find Services by Location > Edmonton > Elder Abuse Resource and Supports \(EARS\) Program](http://www.catholicsocialservices.ab.ca > Find Services by Location > Edmonton > Elder Abuse Resource and Supports (EARS) Program)

Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > for Seniors > Support Services > Stop Elder Abuse](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > for Seniors > Support Services > Stop Elder Abuse)

**Kaalmada nadaafadda guga iyo  
xaadhidda barafka ee waayelka**

Telefoon: 311

Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > for Seniors > Help Around the Home](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > for Seniors > Help Around the Home)

**Cilaqaadka caruurtaada dhalinyarada  
ah – Meesha aad gayn karto  
(Relationship with Your Adult Children  
Drop-in)**

Telefoon: 780-944-5447

**Xarunta Madadaalada Waayelka ee  
Libaaxyada Badhtamaha (Central Lions  
Senior Citizens Recreation Centre)**

Telefoon: 780-496-7369

Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > Senior's Centres](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > Senior's Centres)

**Xarunta Madadaalada Waayelka ee  
Libaaxyada Cidhifka Waqooyi (Northgate  
Lions Seniors Recreation Centre)**

Telefoon: 780-496-6969

Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > Senior's Centres](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > Senior's Centres)

**Ururka Waayelka ee SAGE (SAGE  
Seniors Association)**

Waxaa laga helaa hageha adeegga wayelka

Telefoon: 780-423-5510

Barta Internetka: [www.mysage.ca](http://www.mysage.ca)

**Golaha Iskuduwidda Arimaha Waayelka  
ee Edmonton (Edmonton Seniors  
Coordinating Council (ESCC))**

Telefoon: 780-423-5635

Barta Internetka: [www.seniorscouncil.net](http://www.seniorscouncil.net)

## Xarumaha Waayeelka

La xidhiidh hay'adaha bixiya adeegga waayeelka ee xaafaddaada ku yaala haddii aad 55 sano jirto ama aad ka weyn tahay, si aad u hesho:

- Kaalmo hawlahaa guriga sida dayactirkaa guriga iyo daryeelka jardiinooyinka
- Barnaamijyada caafimaadka, jimicsiga iyo madadaalada
- Kaalmo kuu gaar ah oo fool ka fool ah
- Hawlahaa bulshada iyo ka mid noqoshada kooxaha

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > Senior's Centres](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > Senior's Centres)*

### Koonfurta Edmonton

**Ururka Waayeelka ee Mill Woods**  
Telefoon: 780-496-2997

**Ururka Adeegga Haweenka dhaqamada kala duwan iyo Adeegga Waayeelka (Multicultural Women and Seniors Services Association)**  
Telefoon: 780-465-2992

**Ururka Fursadaha Waayeelka iyo Xaafadaha (Senior Citizens Opportunity Neighbourhood Association (SCONA))**  
Telefoon: 780-433-5377

**Ururka Waayeelka ee Koonfur Bari Edmonton (South East Edmonton Seniors Association)**  
Telefoon: 780-468-1985

**Ururka Waayeelka ee Koonfur Galbeed Edmonton (South West Edmonton Seniors Association)**  
Telefoon: 780-987-3200

### Karunta Strathcona ee 55+ (Strathcona Place 55+ Centre)

Telefoon: 780-433-5807

### Galbeedka Edmonton

**Karunta Waayeelka ee Cidhifka Galbeed (Westend Seniors Activity Centre)**  
Telefoon: 780-483-1209

### Badhtamaha Edmonton

**Karunta Waayeelka ee Xero-ku-dhaladka Edmonton (Edmonton Aboriginal Seniors Centre)**  
Telefoon: 780-476-6595

**Karunta Waayeelka ee Edmonton (Edmonton Seniors Centre)**  
Telefoon: 780-342-8625

**Karunta Waayeelka ee Yuhuudda (Jewish Seniors Citizen's Centre)**  
Telefoon: 780-488-4241

**Ururka Hawlgalka Saaxiibtinmada ee Waayeelka (Operation Friendship Seniors Society)**  
Telefoon: 780-429-2626

**Ururka Waayeelka ee SAGE (SAGE Seniors Association)**  
Telefoon: 780-423-5510

### Waqooyiga Edmonton

**Ururka Wayeelka ee Waqooyi Galbeed Edmonton (North West Edmonton Seniors Society)**  
Telefoon: 780-451-1925

**Ururka Libaaxyada Waayeelka ah ee Badhtamaha (Central Lions Seniors Association)**  
Telefoon: 780-496-7369

**Ururka Waayeelka ee Waqooyiga Edmonton (North Edmonton Seniors Association)**  
Telefoon: 780-496-6969

## GAADIIDKA WAAYEELKA

### Gaadiidka Dad Weynaha ee Edmonton

**Telefoon: 311**  
*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > ETS \(Edmonton Transit System\)](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > ETS (Edmonton Transit System))*

### Gadiidka Naafada Qaangaadhka ah (Disabled Adult Transit Service (DATS))

**Telefoon: 780-496-4567**  
*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > ETS \(Edmonton Transit System\) > DATS Program and Services](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > ETS (Edmonton Transit System) > DATS Program and Services)*

### Bas Raaca Sanadlaha ah ee Waayeelka

**Telefoon: 780-496-1665**

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > ETS \(Edmonton Transit System\) > Senior's Fares and Annual Transit Pass](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > For Seniors > ETS (Edmonton Transit System) > Senior's Fares and Annual Transit Pass)*

### Adeegga Alberta – Macluumaadka Macaamilka

**Telefoon: 780-427-7013**  
*Barta Internetka: [www.servicealberta.gov.ab.ca > Consumer Information](http://www.servicealberta.gov.ab.ca > Consumer Information)*

### Calaamadaha Parking ka Dadka Naafada ah (Placards for Persons with Disabilities)

*Barta Internetka: [www.servicealberta.ca > Drivers/Vehicles > Parking for Persons with Disabilities](http://www.servicealberta.ca > Drivers/Vehicles > Parking for Persons with Disabilities)*

### Ururka Waayeelka Daryeela Waayeelka (Society of Seniors Caring About Seniors)

**Telefoon: 780-465-0311**  
*Barta Internetka: [www.sscas.com](http://www.sscas.com)*

### Ururka Waayeelka ee Caawinta Qaab Nololeedka (Lifestyle Helping Hands Seniors Association)

**Telefoon: 780-450-2113**  
*Barta Internetka: [www.lhhsa.org](http://www.lhhsa.org)*

### Ururka Hawlgalka Saaxiibtinmada ee Waayeelka (Badhtamaha Magaalada) (Operation Friendship Seniors Society (inner city))

**Telefoon: 780-429-2626**  
*Barta Internetka: [www.ofss.org](http://www.ofss.org)*

# 10



### Xaaladaha degdegga ah

Xaalad degdeg ah haddii ay jirto oo aad u baahan tahay kaalmada booliska, dabdamiska iyo ambalaasta la xidhiidh 911. Ha la xidhiidhin 911 haaddii aanay xaalad degdeg ah jirin.

### Gurmadka iyo Samatabixinta Dabka

Gurmadka iyo Samatabixinta Dabka ee Edmonton waxay wax ka qabataa dabka, shilalka baabuurta iyo xaaladaha kale ee degdegga ah ee caafimaadka wax yeeli kara. Waxay sidoo kale bixisaa wacyigelin ammaanka dabka ah.

Xaaladaha degdegga ah oo kaliya, la xidhiidh: 911

Wixii aan degdeg ahayn, la xidhiidh: 311

### Adeegga Booliska ee Edmonton (EPS)

Magaalada dhexdeeda Booliska Edmonton ayaa mas'uul ka ah ilaalinta sharciga.

Xaaladaha Degdegga ah, la xidhiidh: 911

Xaaladaha aan degdegga ahayn, la xidhiidh: 780-423-4567 ama 311

Barta Internetka: [edmontonpolice.ca](http://edmontonpolice.ca)

Boolisku waxaa kale oo uu leeyahay barnaamij badan oo uu ku sugayo ammaanka iyo nabadgalyada magaalada. Si aad macluumaad dheeri ah u hesho, fiiri Buug Gacmeedka Xoojinaya Isfahamka Booliska iyo Bulshada Muhaajiriinta ah. Buuggan waxaa lagu tarjumay 16 luuqadood.

Barta Internetka: [www.edmontonpolice.ca](http://www.edmontonpolice.ca) > About EPS > Community Initiatives > Equity, Diversity and Human Rights > Strengthening Harmony Handbook



## ADEEGGA DHIBBANAHA

Haddii uu dhib kaa soo gaadhey faldanbiyeed ama aad soo martay arimo murugo leh oo aad kaalmo u baahan tahay, booliiska Edmonton wuxuu leeyahay adeeg loogu talagalay in lagu caawiyi dhibbanaha.

Teleefan: 780-421-2218

Barta Internetka: [edmontonpolice.ca](http://edmontonpolice.ca) >Victim Services

## ILAALINTA GAADIIDKA DADWEYNNAHA

Hay'adda Ilaalinta Gaadiidka Dad Weynu waxay dadweynaha ku wacygalisaa sidii loo joogtay lahaa amniga gaadiidka iyo handtida dadweynha. Waxa aad kala xidhiidhi kartaa: Teleefan: 780-442-4900

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Transportation > ETS (Edmonton Transit System) > Safety & Security > Transit-Watch

## XEER HOOSAADKA

XEER HOOSAADKA washarciyo ay magaaladu leedahay kuwaa oo ku foogan hubinta amniga, nidaamka iyo nadaafadda magaalada. Sigaar cabbidda, xaadhidda baarafka, meelaha gawaadhida la dhigo, ruqsada xayawaanka rabbaayadaysan, qashinka xaafadaha, ruqsooyinka, wadada oo meel khalad ah laga gooyo, xuduudaynta iyo bixinta lacagta gaadiidka dadweynahu waa qaybo ka mid ah waxyaalaha uu Xeer Hoosaadku gacanta ku hayo. Haddii aad jabiso xeer hoosaadka waa in aad ganaax bixiso.

Macluumaaad dheeri ah oo ku saabsan xeer hoosaadka waxaad ka heli kartaa:

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Bylaws & Licenses

## RABSHADDA QOYSKA

Lambarka Edmonton ee 211 ayaa kugu xidhi kara adeegga aad u baahan tahay ee la xidhiidha rabshadaha iyo xadgudubka qoyska.

Teleefan: 211

Barta Internetka: [www.211edmonton.com](http://www.211edmonton.com) and search for Family Violence

## Guryaha Degdegga ah ee loogu talagalay dhibbanayaasha

### rabshadaha iyo xadgudubka qoyska

Waa guryo amnigoodu sugar yahay oo bilaash ah kuwaa oo ay kaalmo ka heli karaan dadka ay waxyeeladu kasoo gaadhay rabshadaha qoyska.

## HOYGA HAWEENKA IYO CARRUURTA

### Golaha Hoysiinta Dumarka ee Alberta

Teleefan: 1-866-331-3933

Barta Internetka: [acws.ca](http://acws.ca)

### Jimciyadda Hoysiinta ee Lurana

Teleefan: 780-424-5875

Barta Internetka: [www.canacal.com/lurana](http://www.canacal.com/lurana)

### Guriga WIN

Guriga WIN waa hoy dumarka muhaajiriinta, qaxootiga ama kuwa ku waxyeeloobay ganacsiga dadka loogu talagalay.

Teleefan: 780-479-0058

Barta Internetka: [www.winhouse.org](http://www.winhouse.org)

### WINGS of Providence

Teleefan: 780-426-4985

Barta Internetka: [www.wingsofprovidence.ca](http://www.wingsofprovidence.ca)

## HOYGA WAAYEELKA

### Guriga nabadgelyada ah ee waayeelka (rag / dumar, 60 jir iyo ka weyn

Teleefan: 780-702-1520

Barta Internetka: [www.mysage.ca](http://www.mysage.ca) > Need Help? > Elder Abuse > Seniors' Safe House

## URURADA KALE EE BIXIYA TAAGEERADA DEGDEGGA AH

### ACT Alberta Isutagga Alberta ee ka hortagga ganacsiga dadka (Alberta Coalition on Human Trafficking)

ACT Alberta waxay bixisaa adeegyada dhibbanayaasha ka ganacsiga dadka, waxay maamushaa dhakhliga dhibbanayaasha loogu talagalay, waxay samaysaa baadhis cilmiyeed, tababar, wacyigalin iyo kuwa kale.

Teleefan: 780-474-1104

Barta Internetka: [www.actalberta.org](http://www.actalberta.org)

## Khadka ka Hortagga Faraxumaynta Ubadka

Wac telefoonka si aad u sheegto ilmo la faraxumaynayo. Sharciyu wuxuu qabaa qof kasta oo ka shakiya in ilmo la faraxumaynayo in uu soo sheego.

Teleefan: 1-800-387-5437

Barta Internetka: [edmontonandareacfsa.gov.ab.ca](http://edmontonandareacfsa.gov.ab.ca)

## Danbi Baajiyayaalka

Kani waa urur samafal ah kaa oo la shaqeeya booliska si loo xalliyo dambiyada iyada oo aan la daahfurin cidda maclumaadka bixinaysa.

Teleefan: 1-800-222-TIPS (8477)

Barta Internetka: [www.edmontonpolice.ca](http://www.edmontonpolice.ca) > Crime Files > CrimeStoppers

## Xarunta ka Hortagga Faraxumaynta ee Edmonton

La xidhiidh si aad u sheegto kaalmana u hesho haddii faraxumayn laguu gaystay.

Teleefanka xafiiska: 780-423-4102

Telefoonka maclumaadka iyo kaalmada: 780-423-4121

Barta Internetka: [www.sace.ab.ca](http://www.sace.ab.ca)

## Rugta Xakamaynta Sunta

La hadal haddii aad u baahan tahay maclumaad la xidhiidha sunta ama haddii adiga ama qof aad taqaano la sumeeyo.

Teleefan: 1-800-332-1414

Barta Internetka: [www.albertahealthservices.ca](http://www.albertahealthservices.ca) > Health Information > PADIS > Poison

## REACH Edmonton

REACH Edmonton waxay la shaqaysaa bulshada si ay u siiso aadeeg kala duwan kuwaa oo sahlaya sidii loo dhisi lahaa bulsho ammaan ah oo is daryeesha.

Teleefan: 780-498-1231

Barta Internetka: [www.reachedmonton.ca](http://www.reachedmonton.ca)



## SHARCIGA IYO XUQUUQDA DADKA

### NIDAAMKA SHARCIGA EE KANADA

Dadka Kanada ku nool waxaa laga doonayaa in ay sharciga bartaan oo ay ilaaliyaan. Saddex sharci oo kala duwan ayey Kanada leedahay: sharciga danbiyada, sharciga madaniga ah iyo xeer hoosaadka degmooyinka.

Sharciga danbiyadu wuxuu difaaca dhammaan xubnaha bulshada. Wuxuu daboolaa danbiyo badan sida tuugada, dilka, xadgudubka, ka ganacsiga iyo haysashada maandooriyaha, musuqmaasuqa iyo danbiyo kale. Haddii danbi lagugu soo eedeeyo ilaa ay maxkamadi kugu caddaynayo danbigaa waxaad tahay danbi la'aan. Aad ayey muhiim u tahay maxkamadda cadliga ku dhisan. Haddii danbi lagugu helo oo lagu xukumo, waxaad yeelaynaysaa taariikh danbiile waxaana lagaa xannibayaan waxyaalaha qaarkood. Maxkamad faldanbiyeed haddii lagu saaro, nidaamka sharciga maxkamadaha ayaa bixinaya wixii kharash ah ee ku baxa sida haddii aad u baahato tarjumaan.

Sharciga madaniga ahi wuxuu xalliyyaa khilaafaadka dhexmera shaqsiyaadka caadiga ah, ururada ama goobaha ganacsiga ee ku saabsan lahaanshaha hantida iyo qandaraasyada. Qof walba isaga ayaa iska bixiya kharashka ku baxa dacwadda maxkamadda madaniga ah la keeno.

XEER HOOSAADKA DEGMOOYINKU WAA SHARCIYO DAWLADDA HOOSE AY SAMAYSAY OO ILAALIYA NABADGELYADA, NADAAFADA IYO NIDAAMKA BULSHADA. SIGAAR CABBIDDA, BARAF XAADHIDDA, GOOBABA BAABUURTA LA DHIGO, SHARCIYADA XAYAWAANKA RABBAAYADAYSAN, DAARADAHKA KHARIIBAN, SHATIGA, DARIIQA OO AY DADKU MEEL KHALAD AH KA GOOYAAN, QORSHABA MAGAALADA IYO BIXINTA KHARASHKA LAGU RAACO GAADIIDKA DAD WEYNHA INTUBA WAXAY KA MID YIHIIN WAXYAAALAHU UU XEER HOOSAADKA DEGMADU MASUULKAA YAHAY. HADDII UU QOFKU JABIYO MID KA MID AH XEERHOOSAADKA GANAAX AYEY DAWLADDA HOOSE SAARAYASAA, WAANA INUU BIXIYAA GANAXAAS.

## **QAREENADA**

### **Hay'adda Sharciga ee Alberta Qaybta Qareen u Gudbinta (Law Society of Alberta's Lawyer Referral Service)**

Haddii aad qareen u baahan tahay, hay'adda sharciga ayaa kaa caawinaya sidii aad mid u heli lahayd

Teleefan: 1-800-661-1095

*Barta Internetka:* [www.lawsociety.ab.ca](http://www.lawsociety.ab.ca) > Lawyer Referral

### **Xarunta Sharciga ee Edmonton (Edmonton Community Legal Centre)**

Haddii aadan kharashka qareenka iska bixin karin, waxa aad heli kartaa kaalmo sharciga la xidhiidha oo loogu talagalay dadka dhakhligoodu uu yar yahay.

Teleefan: 780-702-1725

*Barta Internetka:* [www.eclc.ca](http://www.eclc.ca)

### **Caawimaadda Sharciga (Legal Aid)**

Haddii aadan kharashka qareenka iska bixin karin, Caawimaadda Sharciga ayaa laga yaabaa inay ku caawiso.

Teleefan: 1.866.845.3425

*Barta Internetka:* [www.legalaid.ab.ca](http://www.legalaid.ab.ca)

### **Nootaayada**

Nootaayadu waa xafiisyo ama dad leh awood sharci oo ay dadka ku dhaariyaan, markhaati ku noqdaan waraaqaha sharciga ahna ku tasdiiqiyaan. Inta badan waa

qareeno. Nootaayo badan ayaa Edmonton laga helaa. Si aad mid u hesho, Internetka ka raadi Edmonton Notary Publics.

## **XUQUUQDA DADKA**

Kanada dadku way siman yihii. Axdira Alberta ee Xuquuqda Dadka, Jinsiyadda iyo Dhaqamada Badan ayaa illaaliya dadka Alberta ku nool oo dhan kana ilaaliya takoorka noocuu dooniba ha noqdee. Takoorku wuxuu noqon karaa mid ku dhisan jinsi, diin, midab, ahaansha lab ama dhaddig, da', isir, abtir, xaas ahaan, qoys ahaan, isha dhakhliga, naafanimada jidhka, awoodda maskaxda ama dookha qofka ee jinsiga la xidhiidha. Haddii aad dareento in si khalad ah laguula dhaqmay iyada oo arimahaan kore midkood laga dabqaadanayo, la xidhiidh:

### **Lajnada Xuquuqda Dadka iyo Jinsiyadda ee Alberta (Alberta Human Rights and Citizenship Commission)**

Teleefan: 780-427-6013

*Barta Internetka:* [www.albertahumanrights.ab.ca](http://www.albertahumanrights.ab.ca)

### **Xarunta John Humphrey ee Nabadda iyo Xuquuqda Dadka (John Humphrey Centre for Peace and Human Rights)**

Teleefan: 780-453-2638

*Barta Internetka:* [www.jhcentre.org](http://www.jhcentre.org)

## **Xarunta Isirka iyo Dhaqanka (Centre for Race and Culture)**

Teleefan: 780-425-4644

*Barta Internetka:* [www.cfrac.com](http://www.cfrac.com)

## **XEERKA QOYSKA**

Kanada waxay leedahay sharchiyo dadka ka ilaaliya xadgudubka qoyska dhexdiisa ka dhaca kaa oo lagula kaco labada qof ee is qaba midkood, caruurtta ama waayeelka. Noocyada kala duwan ee xadgudubka waxaa ka mid ah midka jidhka, jinsiga, dareenka iyo lacagta. Haddii aad tuhunto in qof lagu xadgudbayo, waxaa waajib kugu ah inaad booliska wargaliso.





52

Kalandarka dhacdooyinka magaalada Edmonton waxaad ka helaysaa waxyalaha ka socda Edmonton.

*Barta Internetka:* [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Attractions & Events > Events Calendar

Isticmaal barta Internetka ee Magaalada Edmonton si aad u hesho macluumaaadka ku saabsan goobaha ciyaaraha iyo madadaalada, jardiinooyinka, xarumaha dib u warshadaynta, aagga webiga iyo garoomada ciyaaraha iyo jidh dhiska.

Taleefan: 311

*Barta Internetka:* [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca)

Si aad u hesho macluumaaad dheeri ah oo ku saabsan mahrijaanada, farshaxanka, dhaqanka iyo dhacdooyinka kale ee Edmonton booqo:

*Barta Internetka:* [www.exploreedmonton.com](http://www.exploreedmonton.com)

## **SOO JIIDASHADA MAGAALADA EDMONTON**

Magaalada Edmonton waxay leedahay meelo dalxiis oo heer sare ah oo ay qoyskaaga oo dhami ku raaxaysan karaan taariikh, degaanka, xayawaanka iwm.

### **Taariikh: Qalcadda Jardiinada Edmonton (Fort Edmonton Park)**

Taariikhda dib u raadqaad oo wax ka ogow Edmonton asalka iyo hiddaheeda.

Taleefan:311

Barta Internetka: [www.fortedmontonpark.ca](http://www.fortedmontonpark.ca)

### **Bii'ada: Xarunta Bii'ada ee John Janzen**

Wax ka ogow bii'ada Waqooyiga Alberta iyo Dooxada Webiga Waqooyiga Saskatchewan

Taleefan: 311

Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Attractions & Events > John Janzen Nature Centre](http://www.edmonton.ca > Attractions & Events > John Janzen Nature Centre)

### **Bii'ada: Hidda-dhigga Muttart (Muttart Conservatory)**

Ku raaxayo gurigan cagaaran ee aad loo habeeyey kaa oo aad ka heli karto geedo iyo ubaxyo adduunka oo dhan laga soo uruuriyey.

Taleefan:311


Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Attractions & Events > Muttart Conservatory](http://www.edmonton.ca > Attractions & Events > Muttart Conservatory)

### **Duurjoogta: Beerta Xayawaanka (The Valley Zoo)**

Daawo xayawaan Alberta iyo adduunka intiisa kale laga keenay.

Taleefan: 311


Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Attractions & Events > Edmonton Valley Zoo](http://www.edmonton.ca > Attractions & Events > Edmonton Valley Zoo)



**Qalcadda Jardiinada Edmonton**



**Bii'ada**



**Hidda-dhigga Muttart**



**Beerta Xayawaanka**

Magaalada Edmonton waxay leedahay dhawr meelood oo madadaalada loogu talagalay iyo baraago lagu dabbaasho. Sanadka oo dhan ayaad kuwan isticmaali kartaa. Goobaha madadaaladu waxay bixiyaan barnaamijyo iyo fasalo kala duwan. Waxaa kale oo ay leeyihii jidh dhiska, guryo dalxiis, meelo lagu ordo iyo qalab jidh dhis. Baraagaha dabbaasha qaarkood waxay leeyihii xilliyo go'an oo ay dumarka kaliya isticmaalaan. Telefoon u dir 311 si aad maclumaaad uga hesho.

54

## ISBOORTIGA IYO MADADAALADA

### Xarunta ACT Jimicsiga Biyaha iyo Madadaalada (Aquatic and Recreation Centre)

Cinwaanka: 2909 – 113 Avenue

### Bonnie Doon

Cinwaanka: 8648 – 81 Street

### Xarunta Farshaxanka ee Magaalada (City Arts Centre)

Cinwaanka: 10943 – 84 Avenue

### Clareview

Cinwaanka: 3804 – 139 Avenue

### Commonwealth

Cinwaanka: 11000 – Stadium Road

### Confederation

Cinwaanka: 11204 – 43 Avenue

### Eastglen

Cinwaanka: 11410 – 68 Street

### Grand Trunk

Cinwaanka: 13025 – 112 Street

### Hardisty

Cinwaanka: 10535 – 65 Street

### BARNAAMIJKAA ISTICMAALKAA GOOBAHA RAAXADA (LEISURE ACCESS PROGRAM)

Barnaamijka Isticmaalka Goobaha Raaxadu waxa uu qoysaska uu dakhligoodu hooseeyo u sahlaa in ay isticmaalaan goobaha raaxada ee Edmonton. Bilaash ama qjimo jaban ayey ku helaan barnaamijyada qaarkood.

Taleefan: 780-496-4918

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Programs & Services > Leisure Access Program

### Jasper Place

Cinwaanka: 9200 – 163 Street

### Kinsmen

Cinwaanka: 9100 – Walterdale Hill

### Londonderry

Cinwaanka: 14528 – 66 Street

### Mill Woods

Cinwaanka: 7207 – 28 Avenue

### O'Leary

Cinwaanka: 8804 – 102 Avenue

### Peter Hemingway

Cinwaanka: 13808 – 111 Avenue

### Scona Pool

Cinwaanka: 10450 – 72 Avenue

### St. Francis Xavier

Cinwaanka: 9240 – 163 Street

### Terwillegar

Address: 2151 – Leger Road



# FARSHAXANKA IYO DHAQANKA

**Edmonton waxay leedahay bulsho farshaxan oo xoog leh. Marka laga tago mahrijaanada sanadka oo dhan socda, waxaa Edmonton ka jira ururo badan oo ay leeyihiiin xirfadlayaasha farshaxanku.**

**Uruurinta Farshaxanka Alberta (Art Gallery of Alberta)**

*Barta Internetka: [www.youraga.ca](http://www.youraga.ca)*

**Matxafka Boqortooyada ee Alberta (Royal Alberta Museum)**

*Barta Internetka: [www.royalalbertamuseum.ca](http://www.royalalbertamuseum.ca)*

**Edmonton Symphony Orchestra**

*Barta Internetka: [www.edmontonsymphony.com](http://www.edmontonsymphony.com)*

**Golaha Murtida iyo Madadaalada Citadel (Citadel Theatre)**

*Barta Internetka: [www.citadeltheatre.com](http://www.citadeltheatre.com)*

**Edmonton Opera Company**

*Barta Internetka: [www.edmontonopera.com](http://www.edmontonopera.com)*

Magaaladu waxay leedahay goleyaal murti iyo madadaalo, kooxo muusig, kooxo qoob ka ciyaar, kooxo farshaxan iyo kuwo kale. Joornaalada, telefishinada, idaacadaha iyo internetka magaalada kasoo baxa ayaad kala socon kartaa xafladaha soo socda. Joornaalka la yidhaahdo Vue ee todobaadlaha ahi waa il wareed wanaagsan oo aad heli karto isaga oo daabacan ama internetka ah.

*Barta Internetka: [www.vueweekly.com](http://www.vueweekly.com)*



## **WAXYAALAHAA SOO JIIDASHADA LEH**

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan makhaayadaha, dhacdooyinka iyo waxa aad isku maaweeelin karto markaad Edmonton joogto, booqo:

*Barta Internetka: [www.exploreedmonton.com](http://www.exploreedmonton.com)*

### **WAXYAALAHAA SOO JIIDASHADA LEH EE EDMONTON LAGA HELO WAXAA KA MID AH:**

Dukaamaysiga suuqyada beeratalayda

Xaafadda Shiinaha iyo ta Talyaaniga

Meelaha farshaxanka, makhaayadaha iyo dukaamadu ku yaalaan ee jidka 124 iyo jidka Whyte Avenue

Lugaynta iyo jidadka baaskiilka dooxada webiga oo dherarkeedu dhan yahay 150 km

Isu soo baxa lagu dhigo dooxada webiga iyo jirdiinooyinkeeda

Soo booqashada mid ka mid ah goobaha waa weyn ee soo jiidashada leh

Isu soo baxa bulshada ee lagu qabto Churchill Square

Daawashada ciyaaradaha xirfadlayaasha

Makhaayadaha badan ee Edmonton



## URURADA BULSHADA

Ururada Bulshadu waxay ku hawlan yihiin sidii ay kuugu diyaarin lahaayeen fursado aad kaga qayb qaadato arimaha bulshada iyo madadaalada iyo sidii darisku uu u kala warhayan lahaa. Edmonton waxay leedahay 154 urur bulsho. Si aad maclumaad dheeraad ah uga hesho ururada xaafadaada ka jira, iyo barnaamijyada iyo adeegga ay bixiyaan, la xidhiidh:

### **Isu tagga Ururada Bulshada ee Edmonton (Edmonton Federation of Community Leagues)**

Taleefan: 780-437-2913

Barta Internetka: [www.efcl.org](http://www.efcl.org)

## URURADA DHAQANKA IYO BULSHADA

Edmonton waa magaalo dad dhaqamo kala duwan leh ay deggan yihiin. Ururo badan oo dad isir iyo dhaqamada kala duwan leh matala ayaa jira. Si aad maclumaad dheeraad ah uga hesho ururadan, la xidhiidh mid ka mid ah hay'adaha badan ee u adeega muhaajiriinta. (eeg qaybta Dib u Dejinta)

## DABBAALDEGGA

Edmonton waxaa loo yaqaanaa magaaladii dabaaldegga. Waxaa ka dhaca in ka badan 30 dabbaadeg oo waa weyn oo isugu jira farshaxanka, qoob ka ciyaarka, muusiga, riwaayadaha, cuntada iyo ciyaaraha xilligga xaggaaga. Laga bilaabo sanadku marka uu dhasho ilaa laga gaadho maalinta Hiddaha ee bisha Agoosto, ilaa dabbaaldegga xagaaga, mar walba waxaa Edmonton ka jira xafladdo aad u wanaagsan.

Barta Internetka: [> Attractions & Events > Festivals & Events](http://www.edmonton.ca)

## KA QAYBGALKA ARIMAHAA BULSHADA – MUTADAWACNIMADA


Mutadawacnimadu waa qayb ka mid ah nolol maalmeedka dadka ku nool Edmonton. Mutadawacnimadu waa si ka mid ah siyaabaha aad magaalada ku kala baran karto, dadka isku baran kartaan bulshadana aad ku dhexgeli karto. Dadka Edmonton degan waxay caan ku yihiin mutadawacnimada. Wakhti badan ayey ugu deeqaan urura bulshada iyo dhacdooyinka gaarka ah. Isku day inaad ka qaybqaadato.

Taleefan: 780-732-6649

Barta Internetka: [www.volunteeredmonton.com](http://www.volunteeredmonton.com)



# NOLOSHA JIILAALKAA EE EDMONTON




## ISTARAATIJIYADDA MAGAALADA EDMONTON EE JIILAALKAA

Edmonton waa magaalo jiilaal, heer kulkeeduna wuxuu gaadhaa 30 – 40 sentigaraydh oo eber ka hooseeya. Sidaa awgeed waa muhiim in dadku ay si habboon u labistaan una diyaargaroobaan jiillalka. In kasta oo ay aad u qabowdahay, haddana waxaa jira damaashaadyo, isu soo bax iyo madadaalo badan kuwaa oo kuu sahlaya inaad jiilaalka ku raaxaysato. Dawladda hoose waxay aad uga shaqayasaa sidii ay magaaladu u noqon lahayd meel nolosheedu fiican tahay xataa marka uu qabow badan jiro.

Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > City Government > Initiatives & Innovation > Winter City Strategy

Lix (6) bilood oo sanadka ka mid ah ayey Edmonton qabow tahay. Barafka u horeeya inta badan wuxuu dhacaa dabayaaqada Oktoobar ama horraanta Nofeember, wuxuuna qabowgu jiraa ilaa dhammaadka Maarsa ama horraanta Abril.



## **WAXYAALAHAA CAANKA AH EE JIILAALKAA LA SAMEEYO EDMONTON**

**Barafka oo lagu dul ordo gudaha  
yo dibbedaba**

**Dalcadaha iyo dibbada  
magaalooyinka oo barafka lagu  
dul ordo**

**Barafka oo lagu simbiririxaysto**

**Soo booqashada xafladaha iyo  
mahrijaanada**

**Goobaha jimicsiga iyo  
madadaalada oo la tago**

### **SAADAASHA HAWADA**

In aad og tahay jawigu sida uu yahay dabadeed aad u labbisato si munaasab ah waxay ka mid tahay waxyalahaa kuu sahlaya inaad ku raaxaysato dhaqdhaqaayada bannaanka lagu sameeyo xilliga jiilaalka.

TVga Jawiga iyo Hay'adda Bii'adda ee Kanada labaduba waxay leeyihii goobo Internetka ah oo aad cimilada kala socon karto. TVga jawigu waa 24 saac, mar kastana waad heli kartaa.

*Barta Internetka: [www.theweathernetwork.com](http://www.theweathernetwork.com)*

*Barta Internetka: [www.weatheroffice.gc.ca](http://www.weatheroffice.gc.ca)*

Sidaa oo kale macluumaadka maalin laha ah ee la xidhiidha cimilada waxaad ka heli kartaa joornaalada, telefishanada iyo idaacadaha maxaliga ah..

### **DABAYSHA QABOW**

Laba heer kul oo kala duwan ayaad maqli doontaa Kanada dhexdeeda. Midka hore waa heer kulka caadiga ah, midka labaadna waa heer kulka dabaysha qabow ay dhaliso. Heer kulka ay dabaysha qabow dhaliso waa midka saxda ah ee bannaanka ka jira. Tusaale, heer kulka caadiga ahi wuxuu noqon karaa-10C laakiin markii lagu daro dabaysha qabow wuxuu noqon karaa -20C. Taa macnaheedu waxaa weeye qabowga saxda ah ee bannaanku waa -20C in kasta oo heer kulka caadiga ahi uu sheegayo -10C. Sidaa awgeed heer kulka dabaysha qabow ayaan mudhaan badan siinaa.

### **SAACADDA OO LA BADDALO**

Edmonton waa magaalo waqooyiga xigta oo dhacda loolka 53 iyo dhigta 113. Waxaa loo yaqaanaa afaafkii waqooyiga. Ku dhawaanshaha ay ku dhawdahay cidhifka kore ee adduunka waxay keentay in maalinta iyo habeenku aanay ahayn saacado siman.

Saacadda oo hal saac horay loogu dhigo xilliga kulaylahaa waxaa loogu talagalay in laga faa'iidaysto saacadaha badan ee ay qoaraxdu soo jeeddo. Waxaa saacadda dib loo dhigaa xilligga dayta. Idaacadaha iyo telefishanada ayaa dadka xusuusiya marka saacadda la baddalayo. Inta badan waxaa saacad lagu daraa xilliga guga ee Maarsa ama Abril, waxaana saacad laga jaraa xilliga dayta ee Oktoober ama Nofeember. .

## WARBAAHINTA – MAXALIGA

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah telefishinada iyo idaacadaha maxaliga ah ee afka Ingiriiska iyo Faransiiska ku baxa kuwaa oo aad ka heli karto macluumaad ku saabsan magaalda, gobolka iyo dalkaba.

### CBC (Canadian Broadcasting Corporation)

Television: Channel 4, 15  
Radio: 93.9 FM, 740 AM  
*Barta Internetka:* [www.cbc.ca](http://www.cbc.ca)

### CBC French – Société Radio Canada

Television: Channel 12  
Radio: 90.1 FM  
*Barta Internetka:* [www.src.ca](http://www.src.ca)

### City TV

Television: Channel 7  
*Barta Internetka:* [www.citytv.com/edmonton](http://www.citytv.com/edmonton)

### CJSR Radio

Jaamacadda Alberta – barnaamijyada ka baxa waxaa soo daaya ardada ama mutadawaciin.  
Barnaamijyadu waxay ku baxaan luuqado kala duwan.  
Radio: 88.5 FM  
*Barta Internetka:* [www.cjsr88.blogspot.ca](http://www.cjsr88.blogspot.ca)

### CKUA Radio

Alberta public radio  
Radio: 94.9 FM  
*Barta Internetka:* [ckua.com](http://ckua.com)

### CTV

Television: Channel 2  
*Barta Internetka:* [www.edmonton.ctvnews.ca](http://www.edmonton.ctvnews.ca)

### Global

Television: Channel 8  
*Barta Internetka:* [www.globalnews.ca/edmonton](http://www.globalnews.ca/edmonton)

### Shaw TV

Television: Channel 11  
*Barta Internetka:* [www.shaw.ca/ShawTV/Edmonton/](http://www.shaw.ca/ShawTV/Edmonton/)



## WARBAAHINTA – QOWMIYADAH

Hoos waxaad ka helaysaa telefishinada, joornalada iyo warbaahinta Internetka ku baxda ee ay baahiyaan bulsho dhaqameedyadu. Barnaamijyadu waxay ku baxaan luuqado kala duwan.

Warbaahinta Dalka ee Qowmiyadahu waxay soo saartaa liisto joornaalada, idaacadaha, telefishinada iyo warbaahinta Internetka ee Edmonton.

*Barta Internetka:* [www.nationalethnicpress.com](http://www.nationalethnicpress.com)

## TELEVISION

### Alta TV

*Barta Internetka:* [www.altatv.ca](http://www.altatv.ca)

### OMNI TV

*Barta Internetka:* [www.omnity.ca](http://www.omnity.ca)

### Soy Hispano

*Barta Internetka:* [www.soyhispano.tv](http://www.soyhispano.tv)

## RADIO

### Chinese Outreach Christian Fellowship

Taleefan: 780-466-4809

*Barta Internetka:* [www.chineseoutreach.ca](http://www.chineseoutreach.ca)

### CJSR FM 88.5

*Barta Internetka:* [www.cjsrfm88.blogspot.ca](http://www.cjsrfm88.blogspot.ca)

### Radio Desh Punjab

Taleefan: 604-506-6123

*Barta Internetka:* [www.deshpunjabradio.com](http://www.deshpunjabradio.com)

### Sin Fronteras

Taleefan: 780-974-3017

*Barta Internetka:* [www.sinfronteras.ca](http://www.sinfronteras.ca)

### World FM

Taleefan: 780-423-2005

*Barta Internetka:* [www.worldfm.ca](http://www.worldfm.ca)

## WARBAAHINTA QORAALKA IYO INTERNETKA

### Asian Tribune Journal

Taleefan: 780-423-9922

*Barta Internetka:* [www.asiantribune.ca](http://www.asiantribune.ca)

### Canadian Arab News

Taleefan: 780-406-2238

### The Chinese Journal

Taleefan: 780-424-0213

*Barta Internetka:* [www.thechinesejournal.com](http://www.thechinesejournal.com)

### Des Pardesh Times

Taleefan: 780-463-8800

*Barta Internetka:* [www.despardeshtimes.com](http://www.despardeshtimes.com)

### Diversity Magazine

Taleefan: 780-705-3338

*Barta Internetka:* [www.diversitymag.ca](http://www.diversitymag.ca)

### Edmonton China Webpage

*Barta Internetka:* [www.edmontonchina.ca](http://www.edmontonchina.ca)

### Edmonton Chinese News

Taleefan: 780-426-3452

*Barta Internetka:* [www.edmontonchinesenews.com](http://www.edmontonchinesenews.com)

### Edmonton Jewish News

Taleefan: 780-421-7966

*Barta Internetka:* [www.edmontonjewishnews.com](http://www.edmontonjewishnews.com)

### Edmonton Korean Newspaper

*Barta Internetka:* [www.hanguksinmun.com](http://www.hanguksinmun.com)

### Il Nuovo Mundo

Taleefan: 780-475-4645

### Italian Times

Taleefan: 780-475-4645

### Korean Weekly

Taleefan: 780-422-9222

### L'Eco D'italia (Western Canada)

Taleefan: 780-475-4645

### La Prensa

Taleefan: 780-800-1672

### The Link

Taleefan: 780-475-4645

### Mill Woods Mosaic

Taleefan: 780-465-7526

### Newcomers TV

*Barta Internetka:* [www.nctv.ca](http://www.nctv.ca)

### North American Chinese Weekly

#### Edmonton

Taleefan: 780-454-8918

*Barta Internetka:* [www.nacnews.ca](http://www.nacnews.ca)

### Punjabi Net

*Barta Internetka:* [www.rasoion50th.ca](http://www.rasoion50th.ca)

### Ukrainian Canadian Herald

Taleefan: 780-455-8695

### Ukrainski Visti Ukrainian News

Taleefan: 780-488-3693

### Vietnam Time Magazine Edmonton

#### (Vietnam Thoi Bao Edmonton)

Taleefan: 780-429-4781

*Barta Internetka:* [www.vietnamtimemagazine.com/vnt\\_edmonton.html](http://www.vietnamtimemagazine.com/vnt_edmonton.html)

### Windspeaker Ammsa

Taleefan: 780-455-2700 Ext 244

*Barta Internetka:* [www.ammsa.com](http://www.ammsa.com)



## DAWLADDA HOOSE

# 12

## MADAXDA LA DOORTO

**Si aad u ogaato qofka  
xaafaddaada laga doorto iyo  
sida aa ula xidhiidhi kartaba  
la xidhiidh:**

Taleefan: 311

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > City  
Government > Councillors & Mayor*

62



## Golaha dawladda hoose ayaa mataala magaalada Edmonton.

Dawladda hoose ee Edmonton waxay ka kooban tahay 13 xubnood: Duqa Magaalada iyo 12 xubnood oo golaha ka mid ah. Afartii sano ba mar ayaa la doortaa. Hal masuul ayaa laga soo doortaa mid kasta oo ka mid ah 12 xaafadood ee Edmonton kuwaa oo loo yaqaano degmo doorasho. Si aad u ogaato degmada doorashada ee aad ku nooshahay, eeg:

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Ward Map*

Golaha Dawladda Hoose waxay magacaabaan Maamulaha Magaalada kaa oo masuul ka ah maamulka magaalada iyo shaqaalaheeda oo dhan. Maamulaha Magaaladu waxa uu xaqiijiyyaa in adeegga ay dawladda hoose bixiso uu waafaqasan yahay jaangoynta iyo qorshaynta Golaha Dawladda Hoose.

Bil walba dhawr jeer ayey kulmaan Golaha Dawladda Hoose iyo guddiyadiisu. Dadweynuhu way iman karaan kulamadan, waxay isu diinwaangalin karaan in ay la hadlaan guddiyada kala duwan.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > City Government*

## XEERHOOSAADKA

Dastuurka Kanada marka la fiiriyo, dawladda dhexe ayaa leh awoodda sharchi dejinta ee dalka oo dhan. Dawlad goboleedyadu waxay dejijaan sharchiyo gobolkooda oo kaliya ay ka dhaqangalin karaan, magaalo walbana iyada ayaa dejisa xeerhoosaadkeeda. Xeerhoosaadka magaalooyinka waxaa ka mid ah xaadidda barafka, nidaaminta muuqaalka guud iyo ka guryaha gaarka ah, meelaha gawaadhida la dhigo, iyo sharchiyada la xidhiidha xakamaynta iyo ruqsadda lahaanshaha xayawaanka rabbaayadaysan. Wuxaan la xidhiidhi kartaa dawladda hoose haddii aad ka cabanayso arin xeerhoosaadka la xidhiidha sida buuq, ey meelaha iskii isaga orordaya ama ciyaya ama arin kale oo lug ku leh xeerhoosaadka.

Taleefan: 311

E-mail [311@edmonton.ca](mailto:311@edmonton.ca)

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca](http://www.edmonton.ca) > Bylaws & Licenses*



## MAXAA KA SOCDA XARUNTA DAWLADDA HOOSE?

Mar walba hawlo ayaa ka socda xarunta dawladda hoose. Xaruntu waa fadhiga maalmulka iyo hoggaaminta magaalada waxaana ka dhaca shirir badan oo ay yeeshaan guddiyada kala duwan ee dawladda hoose. Dadweynuhu shirarkan way tagi karaan. Dadka Edmonton ku nool waxay sidoo kale ku raaxaysan karaan xaflado, dabbaaldegyo iyo dhacdooyin kale oo badan oo lagu qabto xarunta dawladda hoose iyo Churchill Square.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Attractions & Events > City Hall](http://www.edmonton.ca > Attractions & Events > City Hall)*

Haddii aad jeceshahay inaad wax badan ka ogaato xarunta dawladda hoose iyo dawladda hoose qudheeda isu diiwaangali koorso ama safar cilmiyed bilaash ah.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Attractions & Events > City Hall > Tours](http://www.edmonton.ca > Attractions & Events > City Hall > Tours)*

## DOORASHADA IYO TIRAKOOBKA

Si aad u codayso doorashada dawladda hoose, waa in aad Kanadiyaan tahay, 18 sano jirto ama aad ka weyn tahay, Alberta aad deganayd lixdii bilood ee maalinta doorashada ka horraysay, aadna deggan tahay Edmonton maalinta doorashadu ay dhacayso.

Codaynta iyo doorashada madaxdu waxay gundhig u yihiin dimuqraadiyadda. Waa nooc ka mid ah noocyada aad dadka la doortay ugu sheegi karto waxa adiga iyo qoyskaaga muhiimka la ah. Sidaa awgeed waa muhiim inaad ka qaybqaadato oo aad codayso doorashahada dawladda hoose, midda gobolka

yo ta dawladda dhexe. Si aad u ogaato degmada doorashada iyo halka ay coddayntu ka dhacayso, booqo maabka doorsahada.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > City Government > Ward System](http://www.edmonton.ca > City Government > Ward System)*

## KA QAYBGALKA DADWEYNAHA

Taleefan: 780-496-8008

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > City Government > Elections](http://www.edmonton.ca > City Government > Elections)*

## KA QAYBGALKA DADWEYNAHA

Kalandarka ka qaybgalka dadweynuhu waa taxane ay dawladda hoose leedahahay oo u furan qof walba. Qofku waxa uu iman karaa shirarka waxa uuna aragtidiisa ka dhiibban karaa arimaha ku saabsan ama saamayn kara xaafaddiisa.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > Programs & Services > Public Engagement](http://www.edmonton.ca > Programs & Services > Public Engagement)*

## HAY'ADAHAY IYO URURADA DEGAANKA

Magaalada Edmonton waxay maamushaa hay'ado iyo ururo badan si ay wax uga qabato arimaha muhiimka u ah dadka Edmonton deggan. Ururada Degaanku waxay ku hawlan yihiin arimo ay ka mid yihiin xayaawaanka rabbaayadaysan iyo rafcaanka horumarinta. Xubnaha dadweynuhu waxay codsan karaan inay xubin ka noqdaa ururadan. Maamulka ururadan waxaa soo xula Golaha Magaalada iyaga oo kusoo xulaya karti iyo hufnaan.

*Barta Internetka: [www.edmonton.ca > City Government > City Organizations > Agencies, Boards, Committees and Commissions](http://www.edmonton.ca > City Government > City Organizations > Agencies, Boards, Committees and Commissions)*

The information in this guide is current as of December 2016.  
Macluumaadka buuggan ku qorani waxa uu ku saabsan yahay wixii ka horreeyey Diseember 2016.

Language: Somali

The Edmonton logo, featuring the word "Edmonton" in a white, lowercase, sans-serif font.

WAXAA LAGU TARJUMAY XARUNTA QOYSKA QAYBTA DHEXE EE ADEEGGA TARJUMAADDA.

Waxaa tarjumay Cawaale Xuseen Cabdi (Awalle Hussein Abdi). Waxaa tifaftiray Fatouma Abdi Didar. Waxaa dib u eegay Mulki Ali oo ka tirsan Iskaashatada Caafimaadka ee Dadka Dhaqamada kala duwan leh.



Funded by:



Immigration, Refugees  
and Citizenship Canada

Financé par :

Immigration, Réfugiés  
et Citoyenneté Canada